# Ku soo dhawaada Jarmal

jid cadeeyaha da´yarta aan waalidkood la soconin

# Hallo!

Waxaad Jarmal timid adoo kaligaa ah, waxaadna qabtaa su´aalo badan. Buugani wuxuu kugu kaalmaynayaa, inuu su´aalahaa kaaga jawaabo, wuxuuna kuu cadaynayaa qofkaad weydiin lahayd.

Waxaan rabnaa inaan kugu kaalmayno inaad fahanto, waxa aad la kulmi doonto, fursadaha iyo xuquuda aad lee dahay. Waxaa nahay koox dhalin yara ah oo soo martay duruufta/ dhibka ku haysata oo kale. Waxaa jira dad badan oo diyaar u ah inay ku caawiyaan, sidaa darteed waxaan kuu sheegaynaa inaada kaligaa ahayn.

Buugani wuxuu ka kooban yahay lix qaybood, qaybahaana waxaad ka arki kartaa boga soo socda.

Boga soo socda waxaan kuu caday-naynaa, waxa aad la kulmi donto mudada aad Jarmal ku cusubtahay. Maxay yihiin fursadaha iyo xuquuda aad haysato, dadka ama hay´adaha aad la kulmi doonto/ dantaadu ku xiran tahay.

Kalmadaha adag ee buuga ku yaala waxaa lagu qorayaa midab kale, waxaana lagu sii cadayn doonaa qaybta lixaad.

Hadaad rabto inaad ogaato, yaa nahay anagu, waxaad buuga ku arki doontaa sawirkanaga iyo war bixin tanada intaba. Waxaan kuu rajaynaynaa inaag buuga ka hesho warbixinta aad u baahan-tahay oo dhan, waxaana kuu rajaynaynaa khayr badan iyo mustaqbal wacan.

# TUSMADA


**Qaybta 1aad: Ku soo dhawaada Jarmal-waan ku farxaynaa inaad timid! — 1**
Waan imid
Maxay tahay xuquuqda aan leeyahay?
Maxay yihiin xeerarka halkan lagu dhaqmaa?

**Qaybta 2aad: Talaabada kowaad –maxaa dhacaya ugu horaynta? — 7**
Maxay taha Jugendamt (ururka dhalinta iyo Ciyaalka) maxayse qabataa?
Ma waxaan joogi doonaa magaalada aan imid?
Da´daydu maxay sidaa muhiim ugu tahay, maxayse tahay in da´da weyn lagugu qoiyaaso?
Muxuu ii qabanayaa qofka ilaaliyaha ii ahi/ boskii waalidka ii joogaa?
Muxuu ii qabanayaa qofka masuulka iga ahi (BetreuerInnen)
Halkee ayaan degi doonaa?
Maxaan samayn karaa markaan jirado?

**Qaybta 3aad: Mala ii ogol yahay inaan Jarmal Joogo? — 19**
Qaybaha dawlada kee muhiim ah?
Fursada 1aad: waxaad xaq u leedahay inaad qaaxoo-tinimo codsato!
Fursada 2aad: xaqa aad u leedahay degenaanta adoon qaaxooti codsanin!
Fursadaha hadii lagu diido, lagaa codsado inaad wadanka ka baxdo ama lagu celiyo.
Qoyskaygii ma keeni karaa Jarmal?
Maxaa la dhahaa keeska/ dacwada Dublin?

**Qaybta 4 aad: wax barasho- inaan hada wax barasho bilaabo — 31**
Hada si deg-deg ah Iskuul ma u bilaabi karaa?
Maxay tahay waxbarashada la dhoho (Ausbildung)? taas ma heli karaa?
Maxaa la dhahaa (Abitur) yaase jaamicad aadi kara?
Inaan shaqeeyo ma la ii ogol yahay, anoo da yar ah?
Sideen wax barashada xirfada ama Jaamicada dhaqaale ugu heli karaa?

**Qaybta 5 aad: Cadymo ku saabsan nolol maalmeedka — 41**
Ma la ii ogol yahay inaan Akown Banki samaysto?
Maxaan samayn karaa waqtiga aan firaaqada leehay?
Ma la ii ogol yahay inaan safro?
Kaligay guri ma degi karaa?
Gaari ma wadi karaa?
Xagee ayaan kaalmo ka heli karaa?

**Qaybta 6 aad: eray bixiyaha kalmadaha — 47**

# Imaatinka hore

Markaad adoo cusub Jarmal timaado, waxaa laga yabaa inaada garanaynin waxa aad samayn lahayd. Waxaadna u baahan tahay kaalmo. Waxaana qasab ah inaad laamo (Behörde) badan oo ka tirsan dowlada isu sheegto/ u tagto, si ay kuu kaalmayn karaan, tusaale ahaan Hay´ada Dhalinta, Boliska iwm. Dadka heimka kula joogana waa inaad isu sheegto. Guriga waxaa laguu samayn qof masuul (Betreuer) kaa ah nin ama naag mid uun. Qofkaasi wuxuu kaa kaalmayn dhibaatoyinka nololsha maalin laha ah. Tusaale ahaan wuxuu kuu raaci markaad balan leedahay, markaad dhakhtar u baahan tahay, ama markaad wax soo iibsanayso. Waxaa kaloo uu kugu kaalmayn inaad Iskuul hesho/aado, wax barato, layliga kaa caawiyo. Marka danbana wuxuu ku tusi magaalada, wuxuuna ku siin war bixin, waxa aad samayn karto iyo waxa mamnuuca kaa ah. Tusaale ahaan ma raaci karti Baska ama Tareenka adoo aan haysanin Tikit sax ah. Waxaa kaloo aad muhiim u ah inaada wax xadin, ama aada shaqaynin shaqo qarsoodi ah.
Jarmal wax kasta waxaa lagu cadeeyay qawaaniin. Waxaana jira qawaaniin kala duduwan tusaale: qanuunka danbiyada, qaanuunka qaaxotiga, qaanuunka ilmaha iyo dhalinta « Kinder- und Jugendhilfegesetz »...iwm. Jarmal waa wadan dimoqraadi ah, oo qof kasta lee yahay xuquuq iyo waajibaad; dadku waxay lee yihiin xuquuq badan, balse waxaa kaloo horyaala xeerar iyo qawaniin badan.

# Ku soo dhawaada Jarmal

## Waa farxad inaad halkan timid!

**Warbixin kooban oo ku saabsan jarmal:**
Magaca saxda ah ee jarmal waa Jamhuuriyada jarlam ee midowday. Kalmada (Bundes) macnaheedu waa inay jarmal ka koo bantahay gobalo badan oo midoobay ama isu tagay sida Bayern, Nordrhein-Wesfallen iyo Berlin. Xukuumada jarmal ee wadanka oo dhan maamusha waxaa kaloo la shaqeeya 16 Dowlo goboleed oo mid waliba mamulkeeda lee dahay. Dowladu waa hogaanka siyaasada ee gobalada. Dhinacyo badan dowlo goboleedku way u madax banaan-tahay go´aankeeda. Tusaale xagee dadka soo qaxay la dejin, dhismaha Iskuulada. Sidaa darteed bay aad u kala duduwan tahay meelaha dadka soo qaxay la dejiyo, ama noocyada Iskuulka iyo dadka aadaya. Sidaa darteed bay dhalinta soo qaxday aad ugu kala duwan yihiin, marka ay cusub yihiin khibradaha ay maraan, waxayna ku xiran tahay magalada iyo gobalka (**Bundesland**) ay ku nool-yihiin.

# Maxay taha xuquuqda aan leehay?

Karaamada bani aadamku waa lama taabtaan Jarmal. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu fikradiisa, diintiisa, iyo aragti siyaasadeed oo isaga u gaar ah, si xor u muujin karo. Jarmal waxay dadku ka codsan karaan magan-galyo siyaasadeed. Dadka wadamahoodii dagaal dartii uga soo cararay, waxay codsan karaan xaqa ilaalinta/ magan-galyada. Xataa waxaa kaloo jira asbaabo kale oo laga soo qixi karo oo Jarmal la citiraafsan yahay. Tusaale ahaan; gabdhaha oo loo adeegsado galmada, raga ama naagaha is guursada, gabdhaha guurka lagu qasbo iyo asbaabo la xariiira diinta.


Waxaad xaq u leedahay in dhamaan waxa kaa hor imaan doona laguu sheego.Waxaad xaq u leedahay marar badan inaad hesho Tarjumaan nin ama naag kuu tarjuma waxa laguu sheegi rabo iyo waxa aad sheegi rabto intaba.Waxaad xaq u leedahay inaad sheegi karto waxa aad u baahan tahay iyo inaad cadayn karto waxa aada rabin. Waxa aad rabto ama aad jece-shahay waa in laqadariyo.




Taasi waa xuquudda aad leedahay, ciyaal iyo dhalin ahaan markaad Jarmal ku nooshahay:

Waxaad xaq u leedahay inaad ka hesho dawlada iyo laamaheeda ilaalin dheeraad ah, madaama aad usoo qaxday Jarmal, adoo waalidkaa aan kula soconin.

Waxaad xaq u leedahay inaad Skool aado/dhigato.



Waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel caafimaad.



Waxaad xaq u leedahay inaad hesho degenaan iyo waqti free/firaaqo kuu ah. Xaq ma aha in shaqo lagugu qasbo.



Waxaad xaq u leedahay in guri aad degto hay´ada dhalintu kugu soo dhawayso, madaama aad waalid kaa la´aantii timid. Hay´ada dhalinta waxaa qasab ku ah inay kuu qabato dhamaan shaqooyinkii barbaarinta inta aad u baahan-tahay.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho qof wakiil kuu ah nin ama naag (**Vormund/Vormundin**), oo qanuun ahaan arimahaaga kuugu qabta.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho goob aad la degto dhalin/ciyaal, oo laydin ku ilaaliyo, si aad u heshaan nabad galyo, ulana qabsan kartaan xaalada cusub.



Waxaad xaq u leedahay in laguu ogolaado inaad waalidkaa la noolaan karto. Waxaad xaq u leedahay in laguu ogolaado inaad usii safarto wadan kale oo Yurub, hadayna waalidkaa ama walaalahaa oo qaan gaar ah ama qaraabo kale ku nool yihiin halkaa.

Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan (**Klage**) qaadato ood ka dacwooto (**Widerspruch**) hadaad ku qanci weydo Go´aanka dowlada (**Behörden**) ee adiga ku quseeya. Taana waxaa kuu sheegay shaqaalaha laamaha dowlada rag ama dumar ee qaybtaa ka shaqeeya.

Taas waxay u muuqataa mid adag, lakin Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato waxa kaa hor imaan doona iyo inaad fahanto Go´aamada adiga ku taabanaya. Arimaha qawaaniinta la xariira, waxaad u qabsan kartaa Looyar nin ama naag, balse taas waxaa ku bixi kara lacag badan. Dadka ay lacag yari soo gashana Jarmal waxaa jira meelo laga kaalmeeyo oo ay ka helaan talo bixin bilaash ah.



# Maxay yihiin xeerarka halkan ka jiraa?

Jarmal waxaa jira xeerar aad u fara badan, wax kasta waxaa loo sameeyay xeerar. Hadii aad ka yar tahay 18 sano, waalidkaa ama Hay´ada dhalinta ayaa Go´aamada kuu samayn. Inaad Sigaar cabto laguuma ogola madaama aad ka yar tahay 18 sano. Sidoo kale Laysanka wadida gaariga waxaad samayn kartaa markaad 18 sano gaarto. Waxaa qasab ah inaad Taysaradaada/aqooniga mar kasta wadato. Mar kasta oo aad raaci rabto Tareenka ama Baska ama Taraamka dhulka hoostiisa mara waxaad u baahan-tahay Tikitka lagu raaco inaad haysato. Tikitka waa inaad iibsato. Waana qasab in markaad fuulayso aad haysato. Markaad jarmal timaado adoo soo qaxday oo cusub waa lagu rajiis garayn/ lagu qori. Kadibna waxaa la go´aamin meesha laguu ogol yahay inaad degto. Laamaha dowlada mar kasta waa in lasugo. Waa inaad Nr. qaadato, kadibna aad sugto inta Nr.kaaga loo yeerayo. Dhinaca kale waxaa qasab ah mar kasta inaad ku timaado waqti´gii laguu qabtay. Wixii aada ogayn in laguu ogol yahay inaad samayso iyo in kale, mar kasta weydii qofka masuulka (Betreuer/deine Betreuerin) kaa ah nin ama naag ama weydii wakiilkaaga.



Jarmal wax kasta waxaa loo sameeeyay xeerar shaqada habeeya. Dhamaan shaqooyinka muhiimka ah waxaa loo sameeyay dad ka shaqeeya rag ama dumar, shaqadana waa la qaabeeyay, waxaana loo sameeyay qoraalo. Waraaqaha in lasixiixo lana shaabadeeyo waa muhiim. Aad bay muhiim u tahay inaad waraaqaha ilaashato, tusaale; shahaadooyinka (Zeugnisse), waraaqaha ay xafiiska ajaanibtu ku siiyaan iwm. Dokomintigu halkaan qiimo sare ayay lee yihiin. Sidaa darteed waxaa haboon inaad kobiyo badan ka samayso.
"Patience is always difficult, but we have to be patient"

# Maxay tahay Hay´ada dhalintu maxayse qabataa?

Markuu qof da yari oo ka hooseeya 18 sano Jarmal yimaado, isagoo waalidkii ama qof (Sorgeberechtigte) kale oo masuul ka ahi aan la soconin, Hay´ada dhalinta ayaa xilkiisa qaadaysa, xataa adiga. Waxayna ka shaqaynaysaa inaad sifiican u noolaato. Hay´ada dhalintu waa laan dowlada (Behörde) ka tirsan, lagana helo magaalo walba iyo degmo kasta. Waxayna ka shaqaynaysaa inaad degto meel aad nabad ku helayso, cunto, dhar iyo daryeel caafimaadna ka helayso. Meeshaana waxaa la dhahaa guriga soo dhaweynta. Waxaadna helaysaa dad kuu shaqeeya rag ama dumar. Lixdii biloodba haljeer bay kula yeelan Hay´ada dhalintu wada hadal qorshe dejin. Waxaana lagu waraysan sida uu xaalkaagu hada yahay iyo qorshaha kaa horeeya/kuu soo socda. Hadaada lahayn qof wakiil kuu ah, Hay´ada dhalinta ayaa kuu samaynaysa codsiga qaaxotinimada madaama aad u baahan tahay ilaalin. Waana inaad cadayso inaad arintaa u baahan tahay. Hay´ada dhalintu waa inay kuu qabato qof masuul kaa ah nin ama naag iyo qof wakiil kuu ah intaba.

Wakiilku wuxuu kuu qaban arimaha la xariira qawaaniinta, kan masuulka kuu noqona wuxuu kaa kaalmeyn arimaha nolol maalmeedka. Madaama aada wali gaarin 18 sano, Hay´ada dhalinta ayaa lacag ku siinaysa. Waxay kaa bixinaysaa meesha aad degayso, cuntada iyo wixii noloshaada daruuri u ah. Waxaad adigu si khaas ah ugu baahan tahay, waxaa laguu siin lacagta jeebka. Waxa ay Hay´ada dhalintu bilowga hore kula samayso, si ay mustaqbal-kaaga u cadayso, waxaa la yiraahdaaa (Cadayn). Waxaa laga yaabaa in markii hore lagu dejiyay meel la yiraahdo goobta cadaynta, balse labadaasi way kala duwan yihiin.





# Talaabada kowaad

Maxaa dhacaya marka hore?

## Ma waxaan degenaanayaa magaalada aan imid?

Waxaa laga yaabaa Hay´ada dhalinta aad u timid inayna haynin meel banaan, balse magaalo kale ama tuulo kale ay hayso meelo banaan. Markaana waxaa dhici karta inay qasab noqoto inaad guurto. Taasna waxaa la dhahaa qaybinta. Marka u horaysana waxaa la baari halkee boos ka banaan yahay. Intaana waxaaad la sii joogaysaa Hay´ada dhalinta eed u timid. Taana waxaa la dhahaa degenaanta ku meel gaarka ah, hal bil ayaana ugu badan oo ay soconaysaa. Intaana Hay´ada dhalintu waxay baaraysaa inay qasab tahay inaad meel kale degto. Waxaadna xaq u leedahay inaad arintaa kala doodi karto. Tusaale ahaan waxaad cadayn kartaa qofka aad rabto inaad la noolaato, haday yihiin walaalahaa, ama dhalin aad isla soo qaxdeen. Hadii aad dhib/xanuun qabto, ama aad dareemayso inaada sii safri karin, waxaa dhici karta in lagaa dhaafo inaad magaalo kale usii safarto. Waadna u sheegi kartaa hadaad Jarmal ama Yurub dhexdeeda qaraabo ku leedahay, rabtana inaad qaraabadaa u tagto, taas way dhici kartaa lakin sida badan dhaqso lama helo. Waxaad kala hadli kartaa waxa aad jeceshahay qofka masuulka (Betreuer) kaa ah nin ama naag. Lakin marka u danbeeya Go´aanka waxaa gaaraya Hay´ada dhalinta.



# Da´daydu maxay sidaa muhiim ugu tahay, maxaase la dhahaa da´da in laqiyaaso?

Age is very important in Germany. When you newly arrive in Germany, then the youth office, the guardDadu waa muhiim Jarmal dhexdiisa. Markaad Jarmal adoo cusub timaado, waxaa qasab ah in Hay´ada dhalinta, qofka wakiilka kuu ah, xafiiska ajaanibta iyo laanta dowlada u qaabilsan arimaha qaaxootiga (**BAMF**) da´daada ogadaan. Taasina waxay muhiim u tahay meeshii lagu dejin lahaa iyo codsigaaga qaaxooti labadaba (**Asylverfahren**). Lakin hadii markaad soo qaxaysay aada wax Dukumiinti wadanin, way adag tahay inaad cadayso. Waxaana dhacda mararka qaarkood in da´daada la rumayn waayo. Hadaada cadayn qoraalo ah wadankaagii kala imanin, ama aad aqoonsiba wadankaagii ku lahayn, waxaa dhici karta in si da´daada loo ogaado baaritan dhakhtar laguu diro. Dowlad gaboleedyada qaarkood waxaa laguu diri inuu dhakhtar kusoo baaro. Dhakhtarkuna wuxuu baari jirkaaga, lafahaaga, gacma-haaga iyo ilkahaaga, kadibna go´aan buu kagaari da´da aad jirto. Balamaha oo dhan waa inuu kula socdo qofkii masuulka kaa ahaa ama kii wakiilka kuu ahaa. Waxaa qasab ah in luqada aad taqaano laguugu sheego khiyaradka kale ee jira si da´daada loo (**Alterseinschätzung**) qiyaaso. Waxaadna xaq u leedahay inuu dhakhtarku yahay qof adi oo kala ah, hadaad wiil tahay dhakhtar nin ahi ku baaro, hadaad gabar tahayna dhakhtar naag ahi ku baarto.



Mararka qaarkood waxaa dhici karta in da´daada la qadariyo, adoo aan ogayn.
Markaad warqad sixiixayso, waxaa qasab ah inaad hubsato in da´daada si sax ah loo qoray.
Hadii da´daada lagu qiyaaso inaad ka weyn tahay 18 sano, waxaad arintaa kala hadli kartaa Looyarkaaga nin ama naag, ama xataa dad kale oo khibrad leh la tashato sida golayaasha talo bixinta iyo golaha qaxootiga lataliya. Waxaad xaq u leedahay inaad arintaa maxkamada (Gericht) uga dacwooto. Hadii magaaladii aad joogtay lagaa rumaysan waayo inaad da´yar tahay, kadibna magaalo kale laguu badalo, waxaad yeeli kartaa inaad mar kale Hay´ada dhalinta ee magaalada cusub la xariirto. Waxaadna u sheegi kartaa inaad 18 sano ka yar-tahay. Marmar waxaa dhacda inay Hay´ada dhalinta cusub go aan kale qaadato oy ku rumayso inaada wali qaan gaarin.

17? 18? 14?

# Muxuu ii qabanayaa qofka wakiilka ii ahi?

Hadiiba aad 18 sano ka yar tahay, waa qasab in la helo qof xilkaaga qaada, oo daneeya sidaad wanaag ugu noolaan lahayd. Maxayeelay madaama aad ka yar tahay 18 sano, laguuma ogola inaad waraaqaha adigu sixiixato, marar badana go aamada kaligaa ma qaadan kartid. Sidaa darteed waa qasab inaad leedahay qof wakiil kaa ah nin ama naag, oo ku kaalmeeya markaad go aamada qaadanayso, kuuna sixiixa waraaqaha. Wakiilku nin ama naag waa inuu ku garab istaago, kuna weydiiyo waxa aad jece-shahay. Waana inuu kaala shaqeeyo sidaad xuquuq-daada oo dhan u heli lahayd, tusaale inaad Iskuul hesho, xirfad baran karto, meel fiican ku noolaato iyo in-taa kasii badan. Kuwani waa tusaalooyin kooban:



- Markaad rabto inaad codsi qaaxotinimo dhiibato, wakiilkaagu waa inuu kuu gudbiyo, wariysigana (**Asylantrag**) / intervi-uuga sidaad u mari lahaydna kula diyaariyo (**Interview im Asylverfahren**).
- Hadaad rabto inaad kontaraad la gasho meelaha jirka lagu dhiso (McFit) waa inuu wakiilkaagu nin ama naag kuu sixiixo.
- Hadaad u baahan tahay in lagu qalo, waa qasab wakiilkaagu inuu ogaado, go aamiyana inuu qalitaanku sax yahay iyo in kale.
- Wakiilkaagu waa inuu kuu raadiyo Iskuul aad wax kabarato. Hadaad rabto inaad Iskuul badashana waa inaad wakiilkaaga nin ama naag u sheegto.
- Hadaad rabto inaad Iskuul u raacdo safar, wakiil-kaagu waa inuu go aamiyo, kuuna sixiixo.
- Hadii Boliska dhib kaaga yimaado ama ay qasab tahay inaad Maxkamada hor tagto, waa inuu wakiil-kaagu ogaado, kuna difaaco.
- Wakiil-kaaga ayaana xaq u leh go´aanka meesha aad degayso, isaga ayaana sheegaya meesha aad degayso iyo inaad qof kale soo booqan kartid ama magaalo kale aadi kartid.

**Goorma ayaa la ii magacaabi qofka Wakiilka ah?**

Hadiiba aad ka yar tahay 18 sano, timaadana Jarmal adoo waalidkaa aan kula soconin, waxaa laguu samyn qof wakiil kuu noqda nin ama naag. Dhowr asbuuc kadib ayaa laguu dalbayaa wakiil dumar ama rag mid kuu noqdaba. Mararka qaarkoodna bilo ayay qaadataa. Waqti bayna qaadan kartaa inta aad ka baranayso wakiilka. Inta aan wali wakiil laguu helin Hay´ada dhalinta ayaa masuul kaa ah. Waxaa suura gal ah in qof qoyskaaga ka socda ama aad qaraabo tihiin wakiil kuu noqdo. Balse waa inuu yahay qof yaqaana oo fahma-ya qawaaniinta qaaxotiga, xuquuqda dhalinta (Jugendhilfe) ee Jarmal ka jirta oo faro badan.
Lakin hadaad qoyskaaga dhib ku qabto, waxaad ka codsan kartaa Hay´ada dhalinta kaalmo iyo inay wakiil kuu raadiyaan. Sida caadiga ah waxaad wakiil lahaa-naysaa inta aad ka gaarayso 18 sano. Balse hadii aad ka timid wadan lagu qaan gaaro (volljährig) 20sano ama wax kabadan, Jarmala waxaad sii lahaanaysaa wakiil intaa oo kale.


Waxaa jira qaybo badan oo wakiilo ah, waxaana ugu muhim san kuwan soo socda:

- Wakiilka awooda, waana kan u shaqeeya Hay´ada dhalinta, wuxuuna u shaqeeyaa dhalin badan, sidaa darteed mar badan waqtigiisu waa cariiri.
- Wakiil aan lacag qaadanin, waa qof u shaqeeya si daacad ah/ lacag la´aan, sidaa darteed waqti badan ayuu u hayaa dhalinta. Qaarkood dhalinta waxay la kulmaan sabtida iyo axada waxayna la sameeyan shaqooyin fiican.

Hadaada wakill-kaaga shaqadiisa ku farax-sanayn, ama aad dhib ku qabto, ama uusan waqti kuu haynin, waxaad kala hadli kartaa arintaa qofka masuulka kaa ah iyo Hay´ada dhalinta. Markaana waxaa dhici karta in laguu sameeyo wakiil kale nin ama naag oo waqti fiican ku heli kara.

# Muxuu ii qabanayaa qofka masuulka iga ahi ?

Markaad cusub tahay waxaad la degaysaa guri ama meel loogu talo galay, dhalin kale oo iyagana waalidkood aan la soconin. Halkaas qof kasta wuxuu lee yahay masuul gaar ah nin ama naag. Waxay ku kaalmeeyaan nolosha maalin laha ah, tusaale balamaha dhakhtarka, wax soo gadashada iyo hadii loo baahdo shaqada Iskuulka ee guriga lagu qabto. Adigu ma dooranaysid qofka masuulka kuu noqonaya. Lakin hadaad dhib badan ku qabto, waxaad kala hadli kartaa arintaa wakiil-kaaga ama Hay´ada dhalinta. Kadibna waxaa dhici karta in masuul kale laguu helo nin ama naag.



# Halkeen degi doonaa?

Labo ilaa afar bilood kadib, markaad luqadiina waxyar ka baratay, wadan kana waxyar fahantay, ayay hay´ada dhalintu ka fikiraysaa iyadoo adiga iyo wakiil-kaaga la tashanaysa meeshii kale ee lagu dejin lahaa. Waxaana jira fursado kala duduwan: hadii aad rabto inaad lasii degenaato dhalin kale iyo masuulin ku ilaaliya, waxaad ku noolaan kartaa guri ama Kaam ay da´yar kale la wadaagayso. Hadaad rabto inaad kaligaa meel degtana, weydii inaad kaligaa helo karto guri aad qof kale la wadaagto. Waxaa kaloo dhici karta inaad qoys la noolaato/ la degto. Wuxuuna noqon karaa qoys aad qaraabo tihiin ama qoys kale. Waxaana la dhahaa taas qoyska Marti galinta. Hadaad dhib dareemayso oo qof ku danaynaya uusan jirin, ama aada qof kalsooni ah haysanin, waxaad mar kasta u sheegi kartaa Hay´ada dhalinta. Waxaad u sheegi kartaa, inaad rabto in meel kale lagu dejiyo. Markaa Hay´ada dhalintu waxay ku qasban tahay inay ku tusto meel kale oo kaaga fiican tii hore. Lama ogola inaad dad waa weyn la degto.




# Maxaan samayn karaa, hadaan jirado?

Markaad cusub-tahay dhakhtar baa kaa baaraya inaad qabto cudurada faafa ama laysku talaalo. Hadaad jiro qabtana waa lagu daaweyn.
Maxaad samayn kartaa hadii aad jir ahaan ama maskax ahaan u jirato ama xanuun ku qabto intaa kadib?
Waxaad xaq u leedahay inaad hesho dhakhtar ku baara, oo dhibkaaga aad u sheegato, si laguu daweeyo.

- Ma qabtaa cabsi?
- Ma qabtaa fikir xun (waali camal)?
- Ma qabtaa madax xanuun?
- Ma qabtaa daal badan?
- Ma qabta hurdo la, aan?
- Ma qabtaa qandho?
- Ilkuhu maku xanuunaan?
- Lugaha maka jabtay maka dhaa wacan-tahay?

U sheeg qofka masuulka kaa ah nin ama naag, ama wakiil-kaaga nin ama naag midkuu yahay, ama Hay´ada dhalinta, waa qasab inay ku kaalmeeyaan, balan dhakhtara kuu soo qabtaan.

Af jarmal si fiican uguma hadli kartid?
Waxaad xaq u leedahay inuu dhakhtarka kuu raaco tarjumaan.
Dhakhtarka yaa lacag siinaya?
Inta badan daawada waxaa bixiya dowlada, magaalooyinka qaarkood waxay bixiyaan Kaarka caafimaadka, qaarkoodna Hay´ada dhalinta ayaa bixisa warqad laysku daaweeyo. Hadaad u baahan tahay daaweyn, oo laguu diido, kaalmayso wakiilkaaga kuna qasab Hay´ada dhalintu inay kaa bixiso.



**War xibin gaar u ah gabdhaha iyo dumarka da´da yar:**

Jarmal waxaa qasab ku ah gabdhaha iyo dumar-ka da´da yar inay sanadkii ugu yaraan hal jeer u tagaan dhakhtarka haweenka (Frauenarzt) xataa hadayna jiranayn. Waxaa jira baritaan ka hortag ah, si loo ogaado inuu wax kasta ok yahay. Xataa dumarka uurka leh waa inay u tagaan dhakhtarka haweenka. Xataa waxay bixiyaan daawada uurka looga hor tago, weyna ku baarayaan, haduu dhib kula soo darso.


Out of Action
Infos und Gespräche
jeden 1. & 3. Dienstag
im Monat
Bitte Türen

Anagu waxaan nahay koox dhalin yaro ah, oo buugan samayn tiisa kawada shaqeeyay. Da´danaduu waxay u dhaxaysaa 16 ilaa 30 sano, waxaana degenahay Berlin, Brandenburg iyo Nordheim-Westfalen. Warbixin dheeraad ah oo nagu saabsan waxaax ka helaysaa buugan xagiisa danbe.

## Ku saabsan kooxda:

Intaan isla joognay waxay ahayd waqti qaali ah. Qayb naga mid ahi kuma hadli karto Jarmal wanaagsan, lakin waxaan lahayn hal hadaf ah: inaan kulano, kadibna aan noqono koox isku biirtay. Shaqada kadib waan wada cuntaynay waxayna ahayd waqti farxad badan. Waxaan rabnay inaan farxad wadaagno, dadka kalana kaalmayno. Maxaayelay anaga yaa halkan dhib kasoo maray. Ilaa hada waan xariiraa/ is kaalmaynaa. Shaqadii way dhamaatay lakin anagu wali waan isku xiranahay. Waqtigii aan isla qaadanay qiimihiisa kalmado laguma tilmaami karo. Waxaan ahayn hal qoys oo kale.

# Degenaanta

## Jarmal ma degi karaa?

Nasiib daro dadka aduunka ku nool badan-koodu ma dooran karaan meesha ay jecel-yihiin inay degaan. Hadaad jeceshahay inaaad Jarmal ku noolaato, ama aad jeceshahay inaad wadan kale oo Yurub kamid ah usii safarto, waxaad u baahan tahay ogolaansho. Inaad ogo laanshahaa heli karto waxaa go´aaminaysa laan dowlada ka tirsan. Hadaad da´yar tahay, jarmala kaligaa timid, waxaa jirta laba fursadood:

1)Inaad codsi qaaxotinimo dhiibato

2) Ama inaad codsato degenaan (Aufenthalt), adoo aan qaaxoti ahayn.

Muhiim: codsiga inaad Jarmal degi karto waxaa kuu samaynaya wakiil-kaaga nin ama naag. Hadaada wakiil lahayn, waxaa kuu samaynaysa Hay´ada dhalinta.

# Laamaha dowlada kuwee muhiim ah?

## “BAMF”

Hay´ada qaaxotiga iyo dadka soo qaxay ee BAMF, waa laan dowlada ka tirsan. Markaad jarmal codsi magan-galyo u gudbi-sato, mid kamid ah shaqaalaha BAMF ayaa kaa qaaday waraysi. Iyaga ayaana go´aaminaya inaad xaqa qaaxotinimada ama xaqa ilaalinta ama xaqa soo dhaweynta helaysid iyo in kale. BAMF waxaa kaloo ay baaraysaa inaad wadan-kaaga nabad galyo ku helayso iyo in kale, si loo ogaado inaad Jarmal joogi karto. BAMF go´aankee-da way kuusoo diri, xafiiska mamulka ajaanibtana way u diri.

## “TXafiiska maamulka ajaanibta”

Xafiska ajaanibtu wuxuu ku yaalaa magaalo kasta iyo degmo kasta. Hadaada wali codsi qaxooti gudbisanin waxaad u gudbisan kartaa xafiiska maamulka ajaanibta, waxay ku siinayaan Dulqaad (Duldung) ama Visa magac (Aufenthaltstitel) kale leh.
Hadaad codsi qaxootinimo u gudbisatay BAMF, xafiiska maaamulka ajaanibta ayaa ku siinaya Visa ku meel gaar ah (Aufenthaltsgestattung).

Markii dacwadaadii qaxootinimo go´aan laga qaato, waxaad laxariiraysaa xafiiska maamulka ajaanibta oo ku siinaya Visada laguu ogolaaday, kadib markay BAMF soo gaarsiiso.
Xafiiska mamulka ajaanibtu waxaa kaloo uu bixiyaa ogolaan-shaha shaqada, hadiiba aad haysato Dulqaad ama Visada ku meel gaarka ah („Residenzpflicht“).Sidoo kale hadii aad rabto inaad u safarto, dowlo goboleed kale xafiiska ajaanibta ayaa kuu ogolaan kara.
Balamaha xafiiska maamulka ajaanibtu waa muhiim. Balse mararka qaarkood waa dhib. Waxaad xaq u leedahay inuu ku raaco qof aad ku kalsoon tahay.

# Fursada 1 aad:
# Waxaad xaq u leedahay inaad codsi qaxooti gudbisato!

Maxaa la dhahaa in la helo qaxootinimo?

Qaaxoti waxaa la dhahaa qof wadankiisii kasoo cararay? Jarmal waxaa ka jira qaybo badan oo dadka magan-galyo loo siiyo. Xuquuqda la helaana way kala duwan tahay.

Markaad codsi magan-galyo dhiibato, waxaad heli kartaa: xaqa citirafka sare, xaqa ilaalinta dadka soo qaxay, xaqa bani aadamnimada ama in lagaa joojiyo celinta.






Hadii la helo xaqa citirafka sare, ama xaqa ilaalinta, ama xaqa bani aadamnimo, waxay tahay in lagu siiyo ogolaansho aad Jarmal kusii joogi karto. Mudo kadibna waa lafiirin inaad mudo dheer sii joogi kartid. Waxaa lagu siin Visa hal sano ama sadex sano ah.

Hadii lagu siiyo xaqa celinta mamnuuca ah, waxay tahay inuu wadankaagii hada xaalkiisu khatar yahay, madaama aad da´yar-tahay, ama aad qabto xanuun aan wadankaaga lagu daaweyn karin. Markaana waxaa lagu siin Visa hal sano ah. Kadibna waxaa la fiirin doonaa inaad sii joogi doontid iyo in kale. War bixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa fursada labaad.

Hadii lagu siiyo xaqa celinta la joojiyo, waxay ka dhigan tahay inaada Jarmal ka safri karin, tusaale inaada haysanin waraaqo lagu safri karo, ama aad qabto xanuun aada la safri kar-in. Madaama ay taagan tahay ciladii aada la safri karin, waxaa lagu siin Dulqaad/Duldung. War bixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa fursada labaad.

## Inaan xaqa magan-galyada codsado miyaa?

Hadaad rabto inaad Jarmal ka codsato xaqa qaxootinimada, ka fikir arintaa, siina waqti kugu filan. kalana tasho wakiilkaaga nin ama naag iyo qofka masuulka kaa ah iyo Hay´ada dhalinta intaba. Intaada qaaxotinimo codsanin, qaado talooyin badan, qaadana go´aan sax ah markaad si fiican u fahanto geedi socodka dacwada iyo shuruuda-ha layska rabo intaba, markaana ku dhaqaaq gudbinta codsiga magan-galyada. Codsiga qaxootinimadu mudo dheer ayuu socon karaa, markaad bilowdana waa inaad wado ood sugto ilaa dhamaadka.

Waxaa jira asbaabo badan oo Jarmal qaaxotinimo looga helo, kuwani waa tusaloyin yar:

- Hadii lagugu qasbay inaad guursato adoo aan rabin (guurka laysku qasbo).
- Hadii lagug qasbo inaad askari noqoto, inaad koox milatari ah u shaqayso ama u dagaasho (ciyaalka la askareeyo).
- Hadii lagugu qasbay inaad daroogo iibiso ama dhoofiso, ama lagugu qasbo inaad jirkaaga is iibiso (Bani adamka lagu xad gudubo).
- Hadii gabdhaha la guday, jirkooda la goo gooyay, (xubintii dhalmada la dhaawacay).

## Maxaa qasab ah inaan sameeyo?

Markaad codsi qaaxotinimo samayso kadib, waxaa qasab ah in waraysi uu kaa qaado qof ka socda laanta qax-ootiga iyo ajaanibta BAMF, warasigaana waa inaad u diyaar garowdo/ isu diyaariso. Waxaana lagu weydiin doonaa xageed ka timid, sideed Jarmal ku timid. Waxaa kaloo lagu weydiin doonaa; maxaad u codsanaysaa qaaxotinimo, sababtu maxay tahay, inaad wadankaagii waraaqo cadayn ah kala timid ama in laguu soo diri karo, gadaal ka keento.

Waxaad xaq u leedahay inuu wakiilkaaga ama qofka masuulka kaa ahi nin ama naag kuu cadeeyo sida waraysiga loo qaado. Qofkaasi wax badan buu kuu sharxi karaa, kuu dhamayn karaa, waana inuu diyaar kuu yahay, markaad kaalmo uga baahato. Waxaad xaq u leedahay wakiilkaagu nin ama naag, inuu kula joogo marka waraysiga lagaa qaadayo. Waxaa kaloo aad xaq u leedahaay inaad hesho Tarjumaan nin ama naag balamaha muhiimka ah kuu tarjuma. Waraysiga BAMF mar kasta waxaa jooga tarjumaan luqadaada hooyo ku hadlaya. Hadaad tarjumaanka nin ama naag luqadiisa fahmi weydo, waxaad dalbi kartaa tarjumaan kale.

Hadii aad gabar tahay oo aad jeceshahay waraysiga inay qof dumar ahi kaa qaado, tarjumaana kuu noqoto dumar, arintaa waad sheegi kartaa marka lagu waraysanayo. Wiilkuna waa sidoo kale oo wuu codsan karaa in waraysiga uu ka qaado nin, tarjumaankuna nin ahaado. Waxaa kaloo aad xaq u leedahay inuu kula joogo marka lagu waraysanayo ku dhagaysta kuna kaalmayn kara. Waxaana ugu haboon inuu ahaado qofkii waraysiga kula diyaariyay. Hadii aada wali gaarin 14 sano, waxaad xaq u leedahay, inaad weydiisato inaad waraysiga aadin, oo wakiilkaagu kaa qoro dacwadii oo dhan. Kadibna BAMF ayaa go´aaminaysa in waraysiga lagaa dhaafo.

Warasyiga kadib waxaa laguu soo diri qoraalkii dhamaan waxaad sheegtay. Waqti dheer ayay qaadan kartaa in qoraalkaa laguu soo diro. Qof Tarjumaan ahi hakula aqriyo, si fiicana u fiiri/ u hubso in waxaad sheegtay si sax ah loo tarjumay, loona qoray. Hadii aad ku aragto wax aada ogolayn, waxaad xaq u leedahay inaad wax ka badasho, saxdana waxa qaldan kadibna u dirto.

Intaa kadib waxaad sugaysaa jawaabta BAMF. Taana waxaa ku qoran in lagu siiyay xaqa qaxootinimada, ama xaqa ilaalinta, ama xaqa bani aadamnimada ama xaqa celinta mamnuuca ah lagu siiyay iyo in kale. Taasi waxay socon kartaa usbuucyo iyo bilo badan. Haday jawaabtu ogolaansho tahay waxaad helaysaa Viso magac leh. Haday jawaabtu diidmo tahay, degdeg ula xiriir wakiilkaaga iyo qofka masuulka kaa ah nin ama naag, waana inaad raadisaan Looyar nin ama naag. Looyarkaaga wuxuu dacwo ka dhan ah diidmada lagu siiyay kuugu gudbinayaa maxkamada horteeda.

Maxaa la dhahaa Visada ku meel gaarka ah?

Visada ku meel gaarka ahi, waa mida aad haysato inta aad jawaabta sugayso. Visadaana waxaa bixiya xafiiska mamulka ajaanibta.



Maxay yihiin wadamaha nabada ahi?

Wadanka Jarmal wadamo gaar ah ayuu sheegay inay yihiin wadamo nabad ah. Dadka wadamadaa ka yimid Jarmal waxay u aragtaa inayna xaq u lahayn sida caadiga ah inay qaaxotinimo cod-sadaan. Dowlada Jarmal waxay oranaysaa dadka wadamadaa ka yimid, waxay kari karaan inay wadamadoodii ku laabtaan, halkaana si nabad ah ugu nooladaan cabsi la aan iyo daba gal la aan. Taasina waa go´aan siyaasi ah, mana aha inay wadamadaa dadka oo dhani dhab ahaan amaaan ku haystaan. Marar badan waxaa jira umado laga badan yahay oo la cadaadiyo, lagu-maado, laguna xad-gudbo.

Muhiim: waxaa suura gal ah inay jiraan asboobo adi kuu gaar, si aad qaaxootinimo u codsato, adoo xataa ka timid wadamahaa nabada ah. kala tasho wakiilkaaga iyo qofka masuulka kaa ah nin ama naag, inuu wadankaagu kamid yahay wadamada nabada ah iyo in kale. Xafiisyada talo bixinta qaaxotigana ka warayso sidaad xaqa qaxootinimo u heli karto.



# Fuarsada 2: xaqa degenaanta adigoo aan qaaxooti codsanin!

Hadaad jarmal joogto adoo aan waalidkaa kula soconin, waxaa mas´uul kaa noqonaya Hay´adda dhalinta iyo ciyaalka (Jugendamt) ilaa aad ka gaarto 18 sano. Inta aad Jugendamt la joogtana waa isku mid, oo lama fiirinayo inaad codsi qaaxoti/ magan-galyo dhiibatay iyo in kale, ama in lagu ogo-laaday iyo in kale. Hadiiba aad tahay da´yar aan waalidkii la soconin, xaq baad u leedahay inaad Jarmal joogto, laguuna dulqaato ilaa inta aad ka gaarayso 18 sano.
Inta aada qaan gaarin, jarmala aad joogto adoo aan waalidkaa kula soconin, waxaa masuul kaa noqonaysa Hay´adda dhalinta iyo ciyaalka, laguu-mana celin karo wadankii aad ka timid.

Muhiim: haday waalidka kuu maga-caabeen, qof mas´uul kaa noqda ama Hay´ad xuquuqeed oo ku ilaalisa, adigoo da´yar oo timid Jarmal waalidkaana kula soconin, arintaa cadaynteeda oo qoraal ahna ay usoo gudbiyeen xafiiska ajaanibta (Ausländerbehörde), waad weynaysaa xaqii in lagu celiyo kuu diiday ama celinta kaa difaaci lahaa. Hadaada wadan-kaagii hooyo ku laaban karin, ood Jarmal ka rabto magan-galyo, fadlan la tasho oo warayso qofka mau´uulka kaa ah (Vormund) ama qofka ku ilaaliya (Betreuer), si uu talo bixin kaaga siiyo inaad ama intee ayaad qooxootinimo xaq u leedahay.

Maxay tahay degenaanta/ Visada lagu bixiyo "sabab bani aadanimo„?
Markii la codsado magan-galyo siyaasadeed waxaa dhici karta in la helo/ lagu siiyo magan-galyo ama degenaan ku salaysan xaqa bani aadam-nimada. Waana inaad arintaa asbaabaheeda cadayn karto sida in waalidkaa mid kamid ahi dhintay, ama hadaad wadankaagii ku laabato ay khatari kusoo gaarayso, ama inaad qabto jiro/ xanuun aan wadankaaga sifiican loogu daaweyn karin iyo waxyaabo kuwaa lamid ah. Codsiga noocaa ah waxaa xafiiska ajaanibta kuugu gudbin kara, qofka masuulka kaa ah ama Hay´adda dhalinta iyo caruurta. Balse waa inaad marka hore arintaa kala hadasho una sheegto qofka masuulka kaa ah ama ku ilaaliya.

Waa maxay Dulqaad (Duldung) Visada badasha qanuunka celinta?
Waqtiga ka horeeya inta aad 18 sano gaarayso, qofka masuulka kaa ah ama ku ilaaliya ama xata Hay´adda dhalinta waxay kaaga codsan karaan xafiiska ajaanibta Visada dulqaadka (Duldung). Taasna waa lagu siin karaa madaama aad da´yar tahay ooda wali qaan gaarin, ama aad dhigato/ Skuul lagu barto xirfad ama farsamo (Ausbildung). Visada Dulqaad-kana mar kasta waa laguu dheerayn ilaa aad skuulkii ama xirfadii aad baranaysay dhamayso, ama aad ka qaan gaarto, ama ka hesho Visa degenaan oo sax ah (Aufenhaltserlaubnis) tusaale inaad mudo badan joogtay ama aad shaqo fiican heshay iwm.

**Maxay tahay Dulqaadka waxbarashadu?**

Hadaad shirkad ka hesho furso barasho xirfadeed, qofka wakiilka kuu ahi wuxuu kaaga dalbi karaa xafiiska ajaanibta in lagu siiyo Visa inta aad xirfada baranayso. Mararka qaar-koodna taasi way dhici kartaa, hadii xataa waxbarasho Iskuul lagu jiro. Taasna waa inaad waydiiso qofka wakiilka kuu ah nin ama naag. Sidoo kale waxaad weydiin kartaa meelaha talo bixinta xataa xafiiska ajaanibta ayaad toos u weydiin kartaa. Waxaa loo diidi karaa taas dadka ka yimid wadamo nabad ah. Hadii xafiiska ajaanibtu asbaabo kale  kuugu diido inaad shaqayso (lagaa hor istaago), weydii qofka wakiilka kuu ah nin ama naag ama kan ku ilaaliya xuquuqda iyo fursadaha aad leedahay.

**Maxaa la ii siiyay diido ama Hor istaag?**

Xaalado gaar ah ayuu xafiiska ajaanibtu kaa dalbi karaa inaad Basebor keensato. Marka hadaad codsigaa samayn weydo, xafiiska ajaanibku wuxuu ku saari karaa hor istaaag, tusaale wuxuu kuu diidi karaa inaad shaqayso, markaana kama heli kartid shirkadaha waxbarasho xirfadeed. Haday taasi dhacdana weydii qofka wakiilka kuu ah nin ama naag ama kan ku ilaaliya hadii xafiiska ajaanibtu adiga wax kaa dalbo. Hadii xafiiska ajaanibtu ku saaro hor istaag, raadi talo bixin iyo kaalmo badan,.



# Fursadaha jira, hadii lagu diido
# Amarka wadanka ka bax, in qasab laysku celiyo

Hadaad jawaab diida ahi kaaga timaado BAMF ama xataa xafiiska ajaanibta, taasi ma aha go´aan celis ah, balse waa jawaabtii ugu horaysay codsigaagii in la diiday. Xataa laamaha dowladu qalad bay samayn karaan, go´aankoo-dana waxaad uga dacwoon (klagen) kartaa Maxkama-da. Waqtiga aad maxkamada dacwada u gudbin kartaana aad buu u gaaban yahay, mararka qaarkood waa dhowr maalmood oo kaliya. Waxaad si dhaqso ah ugu baahan tahay talooyin xuquuqda ku saabsan iyo Looyar ku difaaca.

Muhiim: haday diido kaaga timaado dacwadaadii qaaxootinimo ee BAMF, ama codsigaagii asbaabaha bani aadam-nimo xafiiska mamulka ajaanibt soo diido horay ula xariir wakiilkaaga iyo qofka masuulka kaa ah intaba. Sidoo kale toos ula xariir iyaga hadii Dulqaadkii ama Visadii ku meel gaarka ahayd xafiiska ajaanibtu diido, inuu kuu dheereyo. Hadii laguu soo diro warqad lagaa codsanayo inaad wadanka si xor ah uga baxdo, ama aad cabsi ka qabto in lagu tarxiilo wakiilkii iyo masuulkii dhaqso ula xariir, iyagaa kugu kaalmayn sidaad talo fiican iyo Looyar u heli lahayd.

Haday kuu timaado jawaab diidmo ah, mar kasta waxaa jira fursado kale: tusaale ahaan wax-aa jira: dacwada dulqaadka, dacwada gudiga xaaladaha adag iyo magan-galyada kaniisada, sidoo kale warbaahinta ayaa la adeegsan karaa. Talo inaad raadiso haka daalin, oo xaalkaaga kala hadal dadka kale. Noloshaada maaalin laha ahna caadi usii wado. Waana xaalad dhib badan oo adag, lakin hadaad caadi u aragto, ood kaalmaysato saaxiibahaa gabdho ama wiilal, Iskuulka, masuulkaaga nin ama naag, wakiilkaaga nin ama naag, ururada iyo wixii kasii badan, waxaad heli kartaa jid laga boxo.

# Qoyskaygii ma keeni karaa Jarmal?

Inta aad ka yartahay 18 sano Jarmal waxaad xaq u leedahay inaad waalidkaa la noolaato. Taas macnaheedu waxay tahay inaad xaq u leedahay inay waalidkaa Jarmal kuugu imaan karaan, hadayna Jarmal ku noolayn. Haday Jarmal iman karaan, waxaa soo raaci kara oo la iman kara walaalahaa aan wali qaan gaarin, gaar ahaan hadayna walalahaa kaligood nolaan karin. Taas waxaa la dhahaa (isu keenida qoyska).
Nasiib daro waxaa jira qawaaniin adkayna inay waalidkaa jarmal kuugu yimadaan. Aday-geeduna wuxuu ku xiran yahay. Visada lagu siiyay nooceeda iyo da´daada.

Shuruudahee ay qasab tahay in la buuxiyo??


Kan kobaad waa inaad haysato, xaqa citirafka ama xaqa ilaalinta mid kood. Hadaad haysato xaqa bani aadamnimo, waad isku dayi kartaa, balse way adag tahay. Mar kastana waxaa jira xeerar gaar ah, sidaa darteed raadi war-bixino fara badan, in Visada aad haysato waalidkaa aad ku keeni karto.
Kan labaadna waa ina markaad codsiga gudbinayso ilaa inta waalidkaa ka imanayaan aad wali ka yar-tahay 18 sano iyo in hooyadaa iyo aabaha midna Jarmal kula joogin.
Markii shuruudaa la buuxiyo kadib ayay waalidkaa iyo walalahaa ka codsan karaan safaarada Jarmal xaqa isu keenida qoyska. Waxayna ka codsanayaan sida caadiga ah safaarada wadanka ay ku nool yihiin. Lakin tan xataa waxaa jiri kara xeerar gaar ah. Dacwadaasina waa mid adag, sida ugu haboona waa inuu kuu sharxo Looyar nin ama naag ama xafiis ka talo bixiya dacwada noocaas ah. Fursada kale ee jirta ee qoys laysugu keeni karo waa; hadii ay Yurub dhexdeeda kuu joogaan waalid ama walaalo qaan gaar ah ama qaraabo kale. Markaana wadankaa ayaad usii socon kartaa, kana codsan kartaa inay ku siiyaan xaqa qaaxotinimo. Safarkaana Jarmal ayaa kuu habayn kara, taasina waqti bay qaadan kartaa, dowlada Jarmala waa inay ogo laataa.






# Maxaa la dhahaa xeerka Dublin?

Waxaad soo martay wadan kale oo ka tirsan midowga Yurub, (EU) (Europäische Union, EU) halkaana waxaa lagaaga qaaday faro. Ama waxaad ka codsatay wadan kale oo Yurub ah qaaxotinimo. Markaad jarmal timaadana waxaa dhici karta in laamo badan oo dowlada ka tirsan ay kaa qaadan faro. Faraha lagaa qaaday ayaa laga fiirin Cumputerka lagu kaydiyo faraha laga qaado dadka soo qaxay oo dhan. Markaa ayaana la arki inaad soo martay wadan kale oo Yurub ah iyo inaad wadankaa codsi qaaxoti ka samaysatay. Jarmal waxay xubin ka tahay midowga yurub (EU). Yurub oo dhana waxaa ka jira xeer la yiraahdo qanuunka Dublin. Wuxuuna habaynayaa wadanka la ogol yahay qofka soo qaxay inuu joogo. Dadka qaangaarka ah waxaa qasab ku ah inay ku laabtaan wadankii ay Yurub ka soo galeen. Lakin taa laguma dabaqayo dhalinta da´da yar ee soo qaxay waalid la aan, hadiiba aad Jarmal ka codsatay qaxootinimo.


Iskuulka hoose (Grundschule)
4/6 Sano
ilmaha oo dhan ayuu qasab ku yahay
9 Sano
10 Sano
12-13 Sano
9-13 Sano
schule
+
+
=
Iskuulka asaaska ah
(Hauptschule)
Iskuulka dhexe
(Realschule)
Iskuulka sare
(Gymnasium)
Iskuulka guud
(Gesamtschule)
Shahadada:
Iskuulka asaska ah
Shahadada:
Iskuulka dhexe
Shahadada:
Iskuulka sare "Abitur"
Si guud Farsamooyinka gacanta iyo Xirfadaha shaqada
Xirfadaha shaqada badankooda
Dhamaan xirfadaha shaqada, waxaana lagu aadi karaa Jamicadaha

# Wax barasho

## Ahada inaad wax barato!

Wax barashada iyo Iskuulka waa talaabada ugu muhiimsan uguna hubaalsan mustaqbalka fiican ee nolosha Jarmal. Nidaamka Iskuulka ee Jarmal waa mid adag, maxayeelay dowlo goboleed kasta waxay leedahay qawaniin ugaar ah. Sidaa darteed fursadaha waxbarasho eed haysato waa inaad ka waraysato dad badan oo kala duduwan, gaar ahaan qofka wakiilka kuu ah. Isaga markaad la tashato waxaa kuu soo bixi kara fursada kuugu fiican. Jarmal waxaa ka jira qanuun qasab ka dhigaya ilmaha oo dhani inay Iskuul aadan, oo ah inay ilmaha oo dhani xaq u leeyihiin waajibna ku tahay inay Iskuul dhigtaan helaan. Iskuulkuna waa lacag la´aan. Waxaana jira noocyo Iskuul badan oo kala duduwan.

Marka kowaad ilmaha oo dhani waxay aadayan Iskuulka hoose. Kadibna waxay sii wadaan Iskuulo sare oo kala duduwan. Dowlo goboleedyadun way ku kala duduwan yihiin, waana sida tan; Iskuulka asaasiga ah, Iskuulka dhabta ah, Iskuulka sare, Iskuulka is-dhexgalka iyo Iskuulka guud. Iskuulka sare eed sii aadaysana wuxuu ku xiran yahay natiiijada aad ka keento Iskuulkii hoose. Kadibna go´aanka waxaad la samayn kartaa macalinkaaga nin ama naag, qofka wakiika kuu ah iyo hay´ada dhalinta.

Markaad rabto inaad xirfad/farsamo barato, waxaad u baahan tahay shahaadada Iskuulka asaasiga ah ama shahaadada Iskuulka dhabta ah. Shuruudaha xirfaduhuna way noocyo badan yihiin. Si aad jaamicad u dhigan karto waxaad u baahan tahay shahaadada sare (Abitur). Waxaa kaloo jirta shahaado sare oo aad ku aadi karto takhasus gaar ah (Fachabitur) layiraahdo. Adoo Iskuulka dhiganaya waxaad samayn kartaa tababar. Tababar-kuna waa furso fiican si aad xirfad usii barato. Taba-barka Iskuulka inaad samayso uma baahnid ogolaansho dowlada. Jarmala wuxuu leeyahay nooya badan oo tababar loo samayn karo. Tababarada qaarkodna waxaad u baahan tahay ogolaaan-shaha xafiiska ajaanibta iyo xafiiska shaqada.

# Hadda  Iskuul ma bilaabi karaa?


Intaada wax kale samaynin kow waa inaad af Jarmal barato/ ku hadli karto. Hadiiba aad 18 sano ka yar tahay, waxaad marka xiga aadaysaa fasalo lagu diyaariyo dhalinta soo qaxday oo ku yaala meesha kuugu dhow. Fasaladaasi waxaa loo yaqanaa magacyo kala duduwan tusaale; fasalada soo dhaweynta, fasalada is dhexgalka, fasalada dadka soo qaxay. Markaad af jarmal ku hadli kartana waxaa laguu badalayaa Iskuul caadi ah.  Iskuulada qaarkoodna waxay lee yihiin fasalo gaar ah oo af jarmal aad kusii baran karto.

# Maxaa la dhaha xirfad barasho? Mase samayn karaa?

Are you tired of school? Then do a job apprenticeship in order to work physically and later be able to earn well! Iskuulkii maka daashay? Markaa waxaad samayn kartaa xirfad barashao, si aad shaqo fiican u heli karto, mus-taqbalkana lacag fiican u heli karto. Hadaada xirfad baranin way  adag tahay inaad shaqo hesho. Xirfad barashada shaqo kasta ayaa u baahan. Xirfad inaad si fiican u barato waxay u baahan tahay inaad akhris ahaan u barato, shaqo ahaana uga shaqayso. Labo ilaa sadex sano kadib waxaa qasab ah in imtixaan la sameeyo, si loo hubiyo qofku inuu xirfadan akhris ahaan iyo farsamo ahaan labadaba u yaqaano.

Kala hadal oo kala tasho hay´ada dhalinta, qofka wakiilka kuu ah iyo kan masuulka kaa ah xirfada aad baran lahayd iyo fursadaha aad haysato intaba. Waxaa kaloo jira xafiisyo badan oo dadka siiya talo bixin lacag la´aan ah, oo kaala talin kara sidaad u heli lahayd xirfad kuu munaasab ah.

Xirfad barashadu waxay leedahay qayb Iskuulka lagu barto iyo qayb goobta shaqada lagu barto. Qaybta




Iskuulka lagu barto waad baran kartaa, wadan kastoo aad ka timid, isagoo aan la fiirinin inta aad jarmal joogtay iyo visada aad haysato nooca ay tahay midna.
Qaybta goobta shaqada laga barto iyadu waa qaybta muhiim ka ah waxayna u baahan tahay inaad xafiiska ajaanibta ka haysato ogolaansho shaqo (in shaqo laguu ogol yahay).

Xasuuso: Hadii wadankaaga loo arko inuu yahay wadan aamin ah, adna aad codsi qaaxoti gudbisatay, ama codsigaagii la diiday, sida caadiga ah laguuma ogola inaad xirfad barasho shaqo ah bilowdo.



| | Nooca Visada | Xirfad barashada Iskuulka | Xirfad barashada Shirkadaha |
|---|---|---|---|
| Visada ku meel gaarka ah (Aufenh.gestattung) | | ✓ | Waxaa go aaminaya xafiisa ajaanibta |
| Dulqaad (Duldung) | | ✓ | Waxaa go aaminaya xafiisa ajaanibta |
| Visada ogo laansha-ha dhabta ah (Aufen. Erlaubnis) | | ✓ | ✓ |

# Maxaa la dhahaa (Abitur) shahadada sare,yaana loo ogol yahay inuu Jaamicad dhigto?



Hadii aad wali jeceshahay inaad wax sii barato, aada rabina inaad bilowdo xirfad barasho, ama inaad shaqo bilowdo, hadaba sii wad wax barashada! Waxaad waxbarashada Iskuulka sii wadi kartaa ilaa Fasalka 12/ 13, kadib-na samayso shahaadada sare ee Iskuulka, kadibna waxaad sii bilaabi kartaa waxbarashada sare ee jaamicada. Inaad Jaamicad bilaabi karto waxay ku xiran tahay aqoonsiga aad haysato iyo dowlo goboleed-ka aad joogto. Hadiiba aad jeceshahay inaad jaamicad dhigato, waa inaad raadiso talo bixin wanaagsan, aadana xafiisyada dadka kala taliyo dhinaca wax barashada.

# Ma shaqayn karaa, anoo da´yar ah?

Haa, lakin shuruud gaar ah bay lee dahay. Waxaana qasab aha inaad arintaa kala hadasho qofka masuulka kaa ha nin iyo naag mid uu yahayba. Hay´ada dhalintana waa inaad u sheegto. Hadaad lacag ka qaadato Hay´ada dhalintu, mushaar-kaaga qayb yar unbaad ka qaadan kartaa, inta kale waxaa qasab ah inaad siiso Hay´ada dhalinta. Markaana muhiim ma aha shaqadu nooca ay tahay (shaqo yar, ama mid waqtiga fasaxa oo kaliya laga shaqeeyo... iwm). Waxaa taa ka duwan oo kaliya hadaad ku shaqayso mushaar la´aan, (iskaa wax u qabso) kadibna lagu siiyo wax yar oo guna ah.


Muhiim: shaqada qarsoodiga ah jarmal lama ogola, waana danbi laysku ciqaabo.

# Sideen lacag ugu helaa barashada xirfada iyo barashada Jaamicada?

Marka uu kaalmihii Hay´ada dhalintu kaa dhamaado, waxaa imanaysa su´aal ah, halkeed lacagta ka qaadataa? Marka aad xirfada qaybta shaqada baranayso, waxaa lacag lagaa siinayaa meesha aad ka shaqayso lacagta shaqada. Hadii aad wali waxbarasho aadana, ama aad qaybtii shaqada ee xirfad barashada ama Jaamicad dhigatit, lacag kama qaadanaysid soshaalka ama Jobcenter (warbixin dheeraad ah gadaal bay ka imaan-aysaa). Waxaa dhici karta in lagu siiyo lacagta (BAfög) ama lacagta ardada xirfadaha baranaysa la siiyo (RAB). In lacagtaa lagu siiyayna waxay ku xiran tahay Visada aad haysato iyo mudada aad Jarmal joogtay. Si aad u hubsato inaad lacagtaa xaq u leedahay iyo fursadaha kale ee kuu furan, raadi xafiisyada talo bixinta. Hadii aad qaadato lacagta BAföG ama RAB, raadi war bixin sax ah ina laguu ogol yahay inaad shaqayn karto.

# Maxaa dhacaya, hadayna lacagtu igu filayn?

Hadaada hay´ada dhalinta kaalmo ka qaadanin, lacagta BAföG ama RAB, ayna kugu filayn inaad bixiso qarashaadkii lagaa rabay oo dhan, waxaad yeeli kartaa inaad kaalmo lacageed ka codsato Jobcenter ama Soshaalka. Sida caadiga ahna waa inaad gudbisato codsi inay xaaladu kugu adag-tahay. Raadi macluumaadka ku saabsan waxyaabaha lagaa rabo ee qasabka ah. Noloshaada riyo haka dhigin, ee riyodaada dhab ka dhig.



# Maxay tahay Xarunta Shaqadu (Jobcenter)?

Jobcenter waa laan kamid ah dowlada Jarmal oo ku taala magaalo kasta iyo degmo kasta. Waxayna kaalmaysaa  dadka waaweyn ee raadinaya shaqo, ilaa ay shaqo ka helaan. Waxayna siisaa dadkaa lacag ay ku noolaan karaan, waxayna ku kaal-maysaa siday shaqo u heli lahaayeen. Mararka qaarkodna (xaaladaha adag) waxay kaalmaysaa lacag siisaa dad Iskuul aada ama xirfad barta. Jobcenter waxay bixisaa lacagta guriga, tan cuntada ama nolosha iyo caymiska caafimaadka intaba. Si ay Jobcenter lacag kuu siiso waa inaad qaan gaar tahay, haysatana aqoonsi sax ah.



# Muxuu yahay Sooshaal (Sozialamt)?




Sooshaalkuna waa laan dowlada kamid ah. Waxaa qasab ku ah Sooshaalku inuu ku kaalmeeyo, Hadaada hay´ada dhalinta kaalmo ka qaadanin, adna aada wali shaqaysanin, Jobcenterna lacag ka qa-adanin. Sooshaalku wuxuu bixiyaa lacagta guriga, tan cuntada ama nolosha iyo caymiska caafimaadka intaba. Sooshaalku wuxuu ku kaalmaynayaa, hadii aad tahay qof weyn, codsigaagii qaaxootigana aan wali go´aan laga gaarin, ama codsigaagii qaaxootinimo la diiday, ama dulqaad/ duludung lagu siiyay.

Nouhaila waa 20 jir, waxayna ka timid Maroko.

Hava Morina waa 16 jir waxayna ka timid Kosova.

Iqbal Tariq waa 17 jir wuxuuna ka yimid Pakistan.



Gholman Rasool Hakimi, Hazara waxay ka yimideen Afghanistan, waxayna jiraan 19 sano.

Aisha waxay ka timid Pakistan, waxayn jirtaa 17 sano

R. Mhandu waa 20 jir.

Alizera Hossein, waxay ka timid Gazhi, Afghanistan, waxaan jiraa 18 sano.



Wael Zarrdah, waa 16 jir, wuxuuna ka yimid Damaskus

Soltan Akbari, Hazera waxay ka yimideen Afghanistan, waxay sameeyaan shahaadada sare, waxayna degen yihiin Berlin.

# Ma furan karaa Akown Banki?

Qof kasta oo Jarmal degen xaq buu u leeyahay inuu Akon Banki furto. Bankiyada Jarmal ku yaalana way u furaan Akon dadka soo qaxay ama loo dul qaadanayo (duldunka haysta).
Akon Banki inuu qofku lee yahay waa wax fiican, wax badan buuna kuu sahlayaa.
Balse waa inaad ogaato inay qasab tahay Akownka ayna lacagi ku filan ku jirto.
Hadaad wax iibsato ama aad lacag bixiso, isagoo Akonkaaga lacag ku filan ku jirin, waxaa dhici karta inaad lacag badan oo ganaax ah bixiso.



# Maxaan samayn karaa waqtiga aan firiiga ahay?

Jarmal qofku waqtiga firiiga uu yahay wax badan ayuu samayn karaa. Halkan Hava ayaa ka sheekaynaysa wax-yaabaha iyo mashariicda ay qabatay:





Qofku wuxuu samayn karaa wax kasta oo uu rabo. Anu waxaan ciyaraa Kubada cagta, waxaa ciyaraa riwaayadaha, ciyaaraha oo dhana waan jeclahay. Sanadkii lasoo dhaafay, Iskuulka kadib waxaan labo jeer usbuucii aadi jiray garoonka kubada lagu ciyaaro shirkada (Moabiter FSV). Waxaa kaloo aan aadi jiray (Clara Outreach) waxaana soo ciyaari jiray riwaaydo kala duduwan.
Waxaa kaloo aan ka qayb galay mashruuc dhalin yaro (Alice, wunderland, Gangaway e.V). Waxaana ka qayb galay riwaayadaha Festiwalla ee 2016 oo ay sameyeen koox dhalin yaro ahi. Waxaa kaloo aan iska qoray jamciyada HUCKEPACK, waxaana ka helay qof i daryeela/ xaaladayda la socda. Ugu yaraan usbuucii hal jeer ayaan la kulmaa qofkaa i daryeela. Waxyaabo badan ayaana wada samaynaa sida; inaan bayskiil soo wadno, ama aan Kiino wada aadno. Waxaana jira Jamciyada kale oo laga heli karo iyagana qof ku daryeela. Waxay u badan tahay in meel kuu dhow laga heli karo.







# Cadaymo ku saabsan nolosha maalin laha ah

## Ma safri karaa?



Haday dacwadaadii qaaxotinimo wali aan go´aan laga gaarin, ama aad Duldung haysato laguuma ogola inaad safarto. Balse hadii aad qaraabo soo boo qanayso, ama aad Iskuulkaaga safar u raacayso, waa inaad hubsato in Ausweis-kaaga ay ku qoran tahay eeriyada aada dhaafi karin iyo mudada aad rabto inaad soo joogto. Sida badan markaad cusub tahay, sadexdii bilood ee ugu horaysa ku jirto, wey adag tahay inaad meel kale u safarto. Hadaad Jarmal dibadiisa u safri rabto, mar kasta waxaad u baahan tahay ogo laan-shaha xafiiska ajaanibta. Inaad u safarto dibada wadanka Jarmal, oo lagaa qaado xanibaadii inaada gobal-ka ka bixi karin, ama xataa inaad Jarmal dhexdiisa u safri karto, wakiilkaaga ayaa xafiiska ajaanibta codsi kuugu diri kara. Go´aankana in lagu fasoxo ama lagu siiyo warqad aad ku safri karto waxaa qaadanaya BAMF.

## kaligay guri aan u madax banaanahay ma degi karaa?

Taas waxay ku xiran tahay inaad noloshaada adigu si fiican u maamuli karto, waxaadna su aashaa weydiin kartaa, marka lagaala hadlayo qorshaha nolosha. In guri la helana waa arin waqti dheer qaadata mar kasta.



# Gaari ma wadi karaa?

Si aad gaari u wadi karto waa inaaad samayso/ leedahay Laysan. Laysan inaad samayso waa wax loo baahan yahay, lakin qasab ma aha inaad isaga ka bilowdo. Qof kasta oo 18 sano ka weyn, wuu samyn karaa Laysan. Balse qofku wuxuu u baahan-yahay inuu haysto aqoonsi sax, si loo hubsan karo qofka uu yahay. Qofka aan wali haysanin degenaan sax ah, warqad dhalasho ama Basaboor sax ahna haysanin, ma samayn karo imtixaanka Laysanka. Si loo barto Laysankana waxaa la sameeyaa labo imtixaan, mid su aalo iyo jawabo ah iyo midka wadida gaariga. Qofkuna waa inuu haysto lacag ku filan barashada Laysanka, maxayeeelay lacag badan baa ku baxda.

# Halkeen kaalmo ka helaa?

Geedi socodka codsiga qaaxotiga iyo degenaanta hore, wixii la xariir waxaad kaalmo ka helaysaa dadka qaaxotiga la taliya. Iyagana waxaad weydiin kartaa su aalo guud ama kuwo gaar ah mid kaad rabto, iyaguna way kaaga jawaabi. Magaalooyin badana xafiis-yada talo bixintu wey ku yaalan.  Qofka masuulka kaa ah iyo wakiilka ayaa kuu sheegi kara, xafiiska talo bixinta ee kuugu dhow.

## Looyar ama Looyarad (Rechtsanwalt/ Rechtsanwältin)

Ma u baahnahay Looyar ama  Looyarad? Mararka qaarkood Looyarku wuu ku kaaalmayn karaa. Tusaala codsiga magan-galyada, ama hadaad u baahato inaad Maxkamad ama Boliska hortagto, ama aad dagaal la ku lantay.

Goorma ayaan Looyar qabsan karaa?
Looyarku wuxuu kaa difaaci karaa laamaha dowlada sida BAMF, xafiiska ajaanibta iyo Jobcenter. Wuxuuna kuu soo dhicin karaa xuquuq-daada. Hadii qof kale ku dulmiyo/ ku dhibana wuu kuu doodi karaa. Looyarku waraqahaaga ayuu kaaga jawaabi, dacwadana wuu kuu qori. Wuuna ku difaaci mar kasta oo dhinaca xuquuqda dhib kaa soo gaaro/dhib kaa hor-yimaado, tusaale; markay warqad xun kuu timaado, ama go´aan celis ahi kuu soo boxo. Looyarku xataa wuxuu kuu raaci  karaa waraysiga.

Looyarka yaa lacag siinaya?
Sida caadiga ah qofka ayaa bixiya Looyarka lacagtiisa, lakin dhalinta da´da yar waxay haystaan fursad inay kaalmo helaan. Arintaana waa inaad kala hadashaa qofka wakiilka kuu ah. Xataa dadka waa weyn ee lacag yari soo gasho, waxay heli karaan kaalmo. Taana waxa la weydiin karaa Looyarka laftiisa.

Sideen u helaa Looyar?
Waxaad weydiin kartaa wakiil-kaaga ama qofka masuulka kaa ah, xataa saxiibadaa iyo qaraabadaada iyo xafiisyada talo bixinta intaba waad weydiin kartaa.

## Cunsuriyayn:

Waxaa dhici karta adiga ama dad kula nool in la cunsuriyeeyo. Cunsuriyayn waxay tahay in qof ama koox dad ah la xumeeyo. Taasina waxay u dhici kartaa siyaabo kala duduwan. Waxaa aad dadka loo cunsuriyeyaa; Jinsigooda, midab-kooda, wadan-kooda, diintooda ama haday galmada gaar ku yihiin. Cunsurinimadu Jarmal waa mamnuuc lakin nasiib daro mar walba wey dhacdaa. Taas waa inaada ogo-laanin una dulqaadanin. Waa inaad kaalmo weydiisato qof aad ku kalsoon tahay, ama aad la xariirto xafiisyada talo bixinta.

## Kaalmo, hadaad dagaal la kulanto:

Qof xaq u leh ma jiro inuu ku xanuujiyo/ku dhibo, ama inuu ku qasbo inaad samayso wax adiga ama dad kale dhibaya. Waxaana jira qaybo badan oo dhib ah ama laysku qasbo. Tusaale waxaa lagu qasbi karaa dhalin wiilal ama gabdho ah inay qof kale xadaan ama soo tuug sadaan, ama daroogo ay iibiyaaan, ama jirkooda iibiyaan, ama dad kale u shaqeeyaan, badal kay Iskuul aadi lahayeen. Dhalin yaro kale hablo ama wiilal wa la-garaacaa. Qaar kale waalid-kood baa handada, ama aad u cadaadiya. Qaar kale waxay soo arkeen kufsi iyo galmo laysku qasbayo. Qofka kufsiga samayna waxaa dhici karta inuu yahay qof uunan aqoonin, ama inuu yahay qof kamid ah dadka la nool oo qoyska kamid ah. Adigu kaligaa ma tihid,waxaa jira meelo badan oo aad hiil ka heli karto iyo xafiisyo badan ood ilaalin ka heli karto, hadii lagu handado ama lagu daba galo. Xafiisyada tala bixintu xataa way ku kaalmayn karaan.

Hadaad qof saxib ama saxiibad ah cabsi u qabto, raadi qof aad ku kalsoon tahay, una sheeg dhacdada iyo cabsida aad qabto. Qofkaaasina wuxuu noqon karaa kan masuulka kaa ah, ama wakiil-kaaga nin iyo naag mid kuu dooni ha noqdee, macalinkaaga, ama qofka Iskuulka u qaabilsan arimaha bulshada ama dhakhtarka, ama Boliska, ama qof deris aad tihiin ama qof aad saxiib tihiin midkuu dooniba ha noqdee. Qofkaasi wuu ku dhagaysan kadibna wuxuu kula raadin xafiiska talo bixinta ee kuugu dhow si aad ula xariirto. Magaalo kastana xafiskaasi wuu ku yaalaa. Jarmal oo dhana waxaa ka jira kaalmo Telefon ood la xariiri karto adoo aan magacaaga sheegin.

Cadayna: hadiiba aad kaalmo, ilaalin, u baahan-tahay hay´ada dhalintu waxay ku qasban tahay inay ku kaalmayso. Gobal kasta waxaa ku yaala telefon iyo xarumo u xil saaran ilaalinta caruurta iyo dhalinta. Gabdhaha iyo dumarka da´yarta ahi waxay la xariiri karaan 08000 116016.
Tan kalana www.queer-refugees.de
Dilka iyo daba-galku waxay sababi karaan, xanuun ku dhaca maskaxda. Taana waxaa lagula tacaali karaa goobaha ama xarumaha dadka soo qaxay lagu daaweeyo. Xarumahaana waxaa dadka loogu daaweyaa si lacag la´aan. Xarumahaa magac-yadooda iyo sidii loola xariiri lahaa waxaad ka helaysaa halkan: www.baff-zentren.org

A

**Abschiebeverbot** Celinta mamnuuc: jarmal waxay oranaysaa: wadankaagii ma aha khatar. Lakin madaama aad da´yar tahay ama aad jiran tahay ma noqon kartid. Maxaayelay adigu gaar ahaan wadankaaga kaalmo ama daryeel kama helaysid. Sidaa darteed waxaa mamnuuc ah in lagu celiyo, waxaana laguu ogo laaday inaad jarmal sii joogto.

**Abschiebehindernisse** Hor istaaga Celinta: laguma siinin aqoonsi sax ah, sidaa oy tahay laguma celin karo hada, waxaana lagu siinayaa Duldung/Dulqaad.

**Ablehnung** Diido: waa go´aankii u horeeyay ee xun, oo dacwadaadii kasoo baxay. Siaad arintaa uga hortagto waxaad haysataa waqti aad u yar, waxaadna u baahan tahay inaad degdeg u qabsato Looyar.

**Alterseinschaetzung** Da´daada laqadariyo: hadaada haysanin cadaymo da´daadu ay ku qoran tahay, waxaa dhici karta in da´daada la rumaysan waayo. Kadibna la qiyaaso ama dhakhtar ku baaro si da´daada loo qiyaaso.

**Asyl** Magan-galyo: waxaa loola jeeda meel aamin ah, oo khatartii dabagalka aad kaga badbaadi karto. Waxayna ku jirtaa jarmal xuquuqda ugu muhiim san, waxayna ku qoran tahay Dastuurka wadanka. Waxaana magan-galyo xaq u leh dhamaan dadka wadamahoodii uga soo cararay gumaad siyaasadeed. Qofkii magan-galyo lasiiyana wuxuu xaq u lee-yahay inuu sadex sano Jarmal sii joogo.

**Asylantrag** Codsi magan-galyo: waxaad furso u leedahay inaad laamaha dowlada Jarmal sida xafiiska ajaanibta, Boliska iwm u sheegto inaad u baahan-tahay magan-galyo. Kadibna waa inaad codsi qoraal ah usoo gudbisaa laanta BAMF. Codsi qaaxoti macnaheedu waa inaad weydiisato magan-galyo waafaqsan dastuurka Jarmal ama qaanunka caalamiga ah ee ilaalinta xuquuqda.

**Asylverfahren** geedi socodka codsiga qaaxotinimo: kadib markaad codsi magan-galyo ugud-bisato hay´ada qaaxootiga iyo BAMF, waa la baarayaa/ la fiirinayaa, go´aan baana laga gaari in lagu siin karo magan-galyo iyo in kale. Taas ayaa la yiraahdaa socodka codsiga qaaxotinimo.

**Aufenthalt** degenaan: si guud waxaa la yiraahdaa meesha uu qofku degen yahay. Qaanuun ahaana waxaa laga wadaa degenaanta lasiiyo qof ajnabi ah inuu dego kuna noolaado Jarmal mudo xadaysan, ama aan lahayn waqti ee furan. Degenaantana waxaa lagu saleeyaa qaanunka xaqa ajaanibta (AufenthG). Waxaana bixiya marka danbe xafiiska ajaanibta isagoo leh magac u gaar ah.

**Aufenthaltserlaubnis** ogolaanshaha degenaaanta: waa ogo laansho waqti goan leh, oo qof ajnabi ah loogu ogo-laado inuu Jarmal ku noo laado.

**Aufenhaltsgesetz** (AufenthG) qaanuunka degenaanta: waa qaanuunka Habeeya/ qeexa soo galida, degenaanta iyo ka bixida ajaanibta ee Jarmal.

**Aufenthaltsgestattung** degenaanta hore: waa degenaanta lagu siiyo inta ay dacwadaadu socoto, oo wali aan go´aan lagaa gaarin.

**Aufenthaltstitel** degnaanta magaceeda: waa aqoonsiga uu bixiyo xafiiska ajaaanibtu ee qoraalka ah, ee qofka ajnabiga ah u ogolaanaya inuu Jarmal ku noolaado.

**Ausbildung** waa waxbarasho socota labo ilaa sadex sano iyo bar, aadna ku baran karto xirfad aad adigu dooratay.

B

**Behoerde/n** laan awood leh: waa laan ka tirsan dowlada, oo fulisa qawaaniinta sida kan xafiiska ajaanibta.

**Betreuer/Betreuerin** barbaariyaha nin ama naag; waa qof weyn oo ka shaqeeya guriga aad Jarmal ka degen tahay. Barbaariyuhu waa qof adiga diyaar kuu ah si uu kuugu kaalmeeyo nolosha maalin alaha ah. Wuxuu kuu raacayaa baalanta dhakhtarka, markaad suuqa wax kasoo iibsanysid. Wuxuu kuu cadaynayaa wax-yaabaha muhiimka kuu ah noloshaada Jarmal. Wuxuuna kugu kaalmeyn sidaad u heli lahaayd Iskuulka aad dhigan lahayd iyo meesha aad luqada Jarmal ka baran lahayd.

**Bundesland** Dowlo gobaleed-yada; Jarmal wuxuu ka kooban yahay 16 Dowlo gobaleed. Waa dowlado aan madax banaanayn, lakin waxay leeyihiin Maamul iyo qawaaniin. Oo dhinacyada qaarkood way madax baanaan yihiin iyagaana go´aamo gaari kara.

**BumF** waa dalada guud ee u shaqaysa dhalinta da´dayar ee soo qaxday, waalidkoodna la soconin. Waana hay´ad ka madax banaan dowlada oo isu xil saartay ilaalinta dhalinta soo qaxay waalid la, aan. Waxaan un shaqaynaa wanaajinta nolosha dhalinta soo qaxday, si ay noloshooda kaligood u dhisan karaan.

Homepage kanaguu waa; www.b-umf.de, facebook:
Https://www.facebook.com/bumfev/

C

**Clearingverfahren** (cadaynta barashada; cadayntu waxay muujinaysaa baahidaada iyo xaqa aad u leedahay in lagu daryeelo lagu kaalmeeyo madaama aad tahay da´yar soo qaxay. Waxaa la ogaanayaa xaaladaada cafimaad sida ay tahay. Waxaa la hubsan inaad jarmal ama Yurub qaraa-bo ku leedahay iyo Iskuulka aad aadi karto. Waxaa kaloo la cadaynayaa sababihii iyo xaaladihii aad kasoo qaxday, waxaana la cadayn nooca visada u horaysa ee lagu siin doono. Waxaana qasab ah inaad adigu ka qayb gasho samaynta qorshahaa. Warbixinta aad dhiibto ayaana lagu dhisayaa aragtiga qorshaha iyo kaalmaha laguu fidinayo ee waqtiga soo socda/mustaqbal-kaaga.

## Qeexida magacyada:

D

**Dolmetscher/in oder Uebersetzer/in** Tarjuman nin ama naag; waa qof ku hadli kara luqado badan, oo hadalada muhiimka ah iyo qoraalada ku tarjuma luqada aad fahmayso.

**Dublin-Verordnung** qaanuunka Dublin; waa qanuun wadamada Yurub oo dhan lagaga camal falo. Wuxuuna habaynayaa, wadankee codsigaaga qaaxoti laga sii wadi doonaa.

**Duldung** Dulqaad; Dulqaad waxaa lagu siinayaa, markii Visada kale laguu diido. Adiga Dulqaad waa lagu siin karaa madama aad da´yar tahay, ama aad xirfad shaqo barato. Duldunkana mar kasta waa laguu dheerayn karaa inta aad Iskuulka, waxbarashada, da´yaraantii aad ku jirto ama aad Visa kale xaq u yeelanayso.

E

**Europaeische Union (EU)** Midowga Yurub; waa 28 wadan oo midoobay, ay ku nool yihiin hada 500 oo Milyan, haystana hal lacag ah (EURO). Haystana hal barlaman ah oo soo saara qawaaniinta Yurub.

F

**Familiengericht** (Maxkamada qoyska; waa maxkamada gaarta go aamada arimaha qoyska. Arimaha qoyska waxaa

kamid ah, su´aasha ku saabsan, maxaa laga yeeli caruurta iyo dhalinta waalid la´aan Jarmal ku nool. Waxaa kaloo laga codsadaa Maxkamada qoyska caruurta iyo dhalinta aan waalid la soconin inay u magacowdo qof wakiil ah. Maxkamada qof kasta ayaa codsigaa u gudbin kara.

**Familienzusammenfuehrung** in Qoyska laysu keeno; waxaad jirtaa 18 sano, waxaad xaq u leedahay inaad labadaadii waalid jarmal kula noolaato. Taas macnaheedu waa, haday waalidkaa ka fog yihiin, inaad xaq u leedahay inay jarmal kuugu yimadaan, hadiiba aad aqoonsi sax haysato. Taas ayaa la dhahaa in qoyska laysu keeno. Marmarna taasi waxay noqon kartaa qaraabo kuu dhow ama walaalahaa.

**Fluechtlingsrat** Golaha qaaxotiga; golaha qaaxotigu wuxuu ku yaalaa dowlo gobaleed kasta iyo magalooyinka waaweyn badan-kooda. Waana gole ka madax banaan dowlada, una taagan ilaalinta xuquuqda dadka soo qaxay. Halkaa waxaad ka heli kartaa talo bixin, war bixino iyo kaalmo dhinaca cadaalada ah. Sidoo kale taakulayn ku saabsan sidaad noloshaada u hor marin lahayd. Listada xafiisyada Golayaasha qaaxotiga iyo xafiisyo kale oo kaalmeeya qaaxotiga waxaad ka helaysaa PROASYL halkan;
www.proasyl.de/beratungsstellen-vor-ort/

**Fluechtlingsschutz** ka fiiri goobta ilaalinta caalamiga ah

**Frauenarzt/Frauenaerztin** dhakhtarka haweenka rag ama naag; waa dhakhtar ama dhakhtarad daaweeya kaliya cudurada ku dhaca haweenka iyo gabdhaha. Haweenku waa inay sanadkii ugu yaraan haljeer utagaan dhakhtarka haweenka si uu u baaro.

## G

**Gemeinschaftsunterkunft fuer Asylbewerber (GU)** (Kamamka guud ee dadka soo qaxay la dejiyo; waa goob ay ku nool yihiin dadka soo qaxay, ee wali aan go´aan laga gaarin ama kuwa dulqaadka ku jooga. Hadii aad ka yartahay 18 sano, waalidkaana kula soconin, halkaa inaad degto laguuma ogola. Waxaana qasab ah inay hay´ada dhalintu ku daryeesho

**Gericht** Maxkamad; waa laan ay dowladu u samaysay in lagu cadeeyo arimaha laxariira cadaalada. Taana waa kamid ah tusaale ahaan; su´aasha, in qofka loo sameeyo wakiil iyo in kale, in qofkii danbi gala la xiro. Hadii go´aan ay dowladu gaartay aad ku qanci weydo, waxaad aadi kartaa adoo Looyarkaagu kula socdo Maxkamada, kana codsan kartaa in Go´aan kaa ka duwan lagaa qaato.

**Grundgesetz** Dastuurka asasiga ah; waa Dastuurka guud ee Jarmal, marmarna waxaa lagu soo gaabiyaa GG.

## H

**Hilfeplangespraech** Wadahadalka qorshaha kaalmaha; wadahadal-kaa waxaa la rabaaa inuu 6 dii biloodba hal jeer dhex maro; adiga, qofka masuulka kaa ah iyo hay´ada dhalinta. Waxaana laga hadli xaal-kaagu hada sida uu yahay iyo in la qorsheeyo sida uu xaalkaagu noqon doono. Adna waxaad sheegan kartaa waxa aad jeceshahay iyo waxa ku dhibaya intaba.

**Humanitaerer Status / Humanitaere Gruende** xaalada bani aadam-nimo; taas waxay noqon kartaa inay waalidkaa ayna noo-layn, ama khatari ku sugayso hadii lagu celiyo, ama inuu xanuun khatar ahi ku hayo iyo kuwaas wax lamid ah. Markaas waxaad heli kartaa in lagu siiyo aqoonsi/ inaad Jarmal joogi karto. Balse waxaa dhici karta aqoonsigaasi inuu noqdo ilaa inta aad ka gaarayso 18 sano.

## I

**Identitaetspapiere** waraaqaha aqoonsiga; waa waraaaqaha

cadaynaya qofka aad tahay; oo ay ku taalo magacaaga, halkee iyo goorma ayaad dhalatay? Tusaale Baseboor, warqad dhalasho iwm.

**Inobhutnahme** Guriga soo dhaweynta; dhamaan ilmaha iyo dhalinta ka yar 18 sano, ee yimid jarmal iyagoo aan waalid la soconin, lahayna qof waalidkii wakiil ka ah, waxaa masuul ka noqonaysa hay´ada dhalinta. Waxaana qasab ah inay ku geeyaan meel aamin ah, ood si fiican ugu noolaan karto. Halkaa waa inaad ku heshaa cunto, dhar, daryeel caafimaad iyo dad masuul kaa noqda. Taas ayaa la dhahaa goobta soo dhaweynta. Mudadaa horana waxaa la fiirin in meel kale laguu badalayo. Waqtigaana waxaa xilkaaga wali haya hay´ada dhalinta, taana waxaa layi raahdaa xaalada ilaalinta ku meel gaarka ah.

**Integrationskurs** koorsaha is dhex-galka; waana koorse in la aado ay qasab tahay, markuu qofku helo ogolaan-shaha codsigiisii qaaxotinimo, oo loo ogolaado inuu Jarmal dego. Wuxuuna gaar u yahay dadka waa weyn ee aan af Jarmal ku hadli karin.

**Internationaler Schutz** Xaqa qaaxotinimada ee caalamiga ha; waa magan-galyo qaaxotinimo, oo aan Jarmal gaar u ahyn, balse Yurub oo dhan laga ogol yahay. Waana magan-galyo ku salaysan qawaaniinta Yurub, inaad jarmal ku noo-laatana aad xaq u yeelanayso. Waxayna ku salaysan tahay inaad heshay mid kamid ah labada darajo (xaqa qaxotinimada ama xaqa ilaalinta) ee qaaxotinimada ugu saraysa. Waxaana la helaa labadaa marka uu wadankaaga dagaal ka jiro.

**Interview im Asylverfahren** waraysiga magan-galyada qaaxotiga; waxaa kaloo lagu magacaa baa dhagaysiga qofka qaaxotiga ah. Markad codsigaaga qaaxotinimo gudbiso, waxaa qasab ah inuu ku waraysto shaqaale kamid ah laanta qaaxotiga iyo magan-galyada BAMF, si loo baaro/loo hubiyo inaad Jarmal xaq magan-galyo ka heli karto iyo in kale. Waxaa lagu weydiin su´aalo ku saabsan wadankaagii, shakhsiyadaada iyo soo qixitaankagii. Hadaada af Jarmal ku hadli karina waxaa kuu imanaya tarjumaan nin ama naag. Wuxuuna kuu tarjumi su´aalaha lagu weydiiyo iyo jawaabahaaga labadaba. Dhamaan waxa lagu weydiiyo iyo waxa aad ku jawaabtaba waa la qori. Waraysiga kadibna qofkii ka socday BAMF wuu akhrin warkii lagaa qoray, adna waa lagu siin. Kadibna wuxuu go´aamin ina laguu ogolaado inaad Jarmal joogto iyo in kale.

## J

**Jugendhilfe** kaalmaha dhalinta; waa shaqada iyo waajibka ay hay´ada dhalinta iyo ururada kale u qabtaan caruurta iyo dhalinta ay hayaan. Waxa ay qabato hay´ada dhalintu iyo sida ay waajibkeeda inay u fuliso ay tahay, waa inay ilmuhu helaan ama ku nolaadan nolol aamin ah oo wanaagsan. Taasina waxay ku qeexan tahay buuga qaanuunka dhalinta (KJHG) ee SGB VIII.

**JOG = Jugendliche ohne Grenzen** dhalinta aan xuduuda lahayn; waxaa la bilaabay sanadkii 2005 ururka dhalinta soo qaxday. Shaqadanaduu waxay ku salaysan tahay inaan anagu cod leenahay, oo siyaasada uusan qof kale nagu matalin (dilaal noo noqonin). Anagaa go´aansanayna shaqada aan qabanayno iyo sida/habka aan u qabanayno labadaba. JOG waxay ka soo horjeedaa nooc kasta oo kamid ah cunsuriyad, gaar ahaan; cunsuriyada umadaha, nacaybka dadka kale, nacaybka islamka iwm. Page kanaguu waa; www.jogspace.net
facebook; htts://de-de facebook.com/ jogspace

K

**Kinder- und Jugendhilfegesetz** (KJHG) qaanuunka kaalmaha ciyaalka iyo dhalinta; waa qanuunka cadaynaya ama lagu qoray kaalmaha la siinayo ciyaalka iyo dhalinta. Waxaa kaloo la dhahaa „SGB VIII „.

**Klage/Klagen** waxaa la dhahaa dacwada loo gudbisto maxkamada. Tusaale hadii aad dacwadii magan-galyada ka hesho jawaab diido ah, waxaad samayn kartaa dacwo aad go´aankaa ku diidayso. Inta badan dacwadaa waxaa dadka u sameeya Looyar, waxaana loo sameeyaa si degdeg ah.

M

**Minderjaehrige/r** da´yarta, sidaa ayaa la dhahaa dhamaan ciyaalka iyo da´yarta aan wali gaarin 18 sano.

O

**Organisation/en** Ururada; waa koox dad ah oo isu tagay am isku xirmay, si ay shaqooyin iyo waajibaad gaar ah u qabtaan. Ururo badan qofku si dhib yar buu u gali karaa ulana shaqyn karaa, tusaale sida ururada kubada cagta. Oo hadafka loo sameeyay uu yahay in kubada lawada ciyaaro. Urura kale oo badana lama geli karo balse kaalmo ayaa laga heli karaa. Tusaale dhalinta soo qaxday waxay kaalmo ka heli karaan Golaha qaaxotiga, ama hay´ada UNHCR ee aduunka.

P

**Protokoll** qoraala laga sameeyo fadhi ama shir; waxaa lagu qoray halkan dhamaan waxaad waraysigii lagula yeeshay ku sheegtay. Qoraalkaana waa laguu soo diri, si aad u hubiso in waxaad sheegtay oo dhan sax loo wada qoray. Wuxuu ku qoran yahay af Jarmal, sidaa darteed waxaa muhiim kuu ah inaad hesho qof waqti ku siiya oo kuu tarjuma.

**Psychologen/Psychotherapeuten** waa shaqada dadka ku daaweyn kara, haduu dhib dhinaca maskaxda/ fikirka ahi ku qabto. Riyada xun, cabsida, fikirka xun waa tusaalaha cudurkaa calaamad u noqon kara. Cudurkaa si lagaaga daaweeyo waxaa jira goobo u gaar ah dadka soo qaxay= xarumaha lagu daweeyo dadka soo qaxay).

R

**Rechtsanwalt/Rechtanwaeltin** Looyar nin ama naag; waa magaca shaqada dadka cadaalada katala bixiya, ama maxkamada horteeda dadka ka difaaca.

**Residenzpflicht** degenaan-taada in xadeeyo; waa in uu xafiiska ajaanibtu xadeeyo xoriyadaadii inaad degto meesha aad rabto. Hadaad haysato Duldung=Dulqaad, sida badan waxaa laguu ogol yahay inaad joogto dowla goboleedka uu kuyaalo xafiiska ajaanibta ee lagaa xukumo. Si laguugu ogolaado inaad Jarmal oo dhan xor u noqoto, waa inaad xafiiska ajaanibta ee lagaa xukumo u gudbisato codsi in laguu fasoxo. Taasina ma aha mid mar kasta la helo. Hadaad sabab muhiim u hasaysato safarka sida; inaad Looyarkaagii la kulmi rabto, ama aad Dhakhtar magaalo kale jooga ballan la leedahy, ama aad qaraabo soo booqan rabto, xafiiska ajaanibtu wuxuu ku siin karaa ogolaansho. Hadaad Hay´ada dhalintu wali ku kaalmayso, waxaa fasax ku siin karaa qofka wakiilka kuu ah. Hadaad fasax la´aan magaladii ama gobalkii kabaxdo, kadibna bolisku ku qabto, waxaa dhici karta in intaa kadib fasax kale laguu diido, ama lacag ganaax aad bixiso. Sida caadiga ah haday Hay´ada dhalintu meel ku dejisay, mamnuuc kaama ah inaad Jarmal dhex marto. Fadlan u tag qofka wakiilka kuu ah iyo hay´ada dhalinta si ay xafiiska ajaaninbta kuula adaan.

**Roentgen(untersuchung)** waa baaritaan dhakhtar oo jirkaaga qayb kamid ah la sawirayo, si loo hubsado

lafahaaga iyo jirkaaga qaybihiisa kale xaalkooda.

S

Subsidaerer Schutz ka fiiri qaybta xaqa ilaalinta caalamiga ah.

Schulabschluss waa shahaadada lasiiyo ardaydu markay Iskuulka si guul ah u dhameeyaan. Waxaana lagu calameeyaa shahaadada qoraal ah oo layiraahdo qalin jabinta Iskuulka.

Schulpflicht jarmal caruurta iyo dhalinta ka da´yar 16 sano waxay xaq u leeyihiin waajibna ku ah inay Iskuul aadan. Taas ayaa la yiraahdaa Schulpflicht, waajibka inuu ilmihii Iskuul aado.

SGB VIII waa buuga 8 aad xeerka sooshaalka, waana buuga qaanuunka ciyaalka iyo dhalinta kaalmahooda.

Sorgberechtigte/r qofka iska leh xaqa korinta ilmaha; waa qofka haya xilka iyo masuuliyada korinta ilmo da´yar ah. Taasna waxay tahay in ilmaha la daryeelo, la tarbiyeeyo, la ilaaliyo, meeschuu degi lahaana la go´aamiyo. Waxaa kaloo kamid ah in ilmaha laga ilaaliyo wixii khatar ah, in maxkamada horteedana masuul laga yahay, Iskuulka iyo wax barashada loo sixiixo. Sida caadiga ilmaha waalidkii ayaa xilkaa u haya, hadayna xilkaa iyagu qaban karina waxaa loo dhiibi qof wakiil u noqda ilmaha.

U

Unbegleitete minderjaehrige Auslaender (umA) waa magac kale oo loo yaqaano, dhalinta soo qaxday ee waalidkood aan la soconin.

Unbelgeitete minderjaehrige Fluechtlinge (umF) waa magaca loo yaqaano dhamaan ilmaha waalid ama qof wakiil ah la aan tii soo qaxay, walina aan 18 sano gaarin.

Unbegleitete Minderjaehrige (UM) waa magac kale oo loo isticmaalo ilmaha soo qaxay ee aan waalid la soconin.

(UN-KRK) waa dalad isku xirta aduunka oo dhan una taagan ilaalinta ilmaha, barlamaanada aduunka oo dhan ay ogolaa-nayaan go´aamadeeda. Qaanuunka UN-KRK wuxuu khuseeyaa oo qorayaa dhalaanka ka yar 18 oo kaliya. Wadamada sixiixay qanuunka ururka UN-KRK waxay ku qasban yihiin inay ixtiramaan, fuliyaana xuquuqda ilmaha Jarmal xataa.

Unterbringung goobta dejinta; waa goobta aad degi karto, adigoo ciyaala ha aad Hay´ada dhalintuna ku kaalmaynayso. Halkaa waxaad la degaysaa caruur iyo dhalin kale, waxaana idin kaalmaynaya barbaariye-yaal idin ilaalinaya. Waxaana jira qaybo badan oo kala duduwan sida; Guriga dhalinta, degaanka dhalin yarada, ama guri aad kaligaa degto. Adi mida kuugu fiican, adaa go´aaminaysid, adoo la tashanaysid hay´ada dhalinta.

V

Volljaehrigkeit, volljaehrig qaangaar; wadamada aduunka badankooda xataa Jarmal, wuxuu qofku qaangaaraa markuu gaaro 18 sano. Wadamaha qaarkood wuxuu qofku qaangaaraa mar danbe. Markaad qaangaarto waxaad helaysaa xaqa inaad sixiixanaysid wixii hashiis am kontrad ah adigu. Dhinaca kale waxaad xanbaaraysaa masuuliyadaadii oo dhan cadaalada horteeda. Markaad qaangaarto waxaad weynaysaa xaqii ilaalinta dhalinta iyo qofkii wakiilka kuu ahaa. Lakin kaalmihii hay´ada dhalinta wuu socon karaa ilaa aad ka gaarayso 27 sano. Qafka wakiilka kuu ah shaqadiisu waxay ku xiran tahay qofka loo shaqaynayo wadankiisa qanuunka ka jira. Taas waxay ka dhigan tahay hadii wadankaaga lagu qaangaaro da ka weyn 18 sano, wuxuu wakiilku kuu shaqayn inta aad ka qaangaarayso xeerkii wadankaaga. Hadii aad ka

timid wadan lagu qaangaaro in ka yar 18 sano, Jarmal taas lama qiimaynayo. cid kasta oo 18 sano kayar jarmal wali waa ciyaal.

**Vormund/Vormundin** wakiilka ilmaha; waa qofka adiga masuulka kaa ah, inta aada qaangaarin, madaama aad jarmal ku noo shahay waalidkaa la´aantii. Qofka wakiilka kuu ah waxaad kala hadlaysaa meeshii aad degi lahayd, Skoolkii aad aadi lahayd. Qofka wakiilka ah oo kaliya ayaa kuu sixiixi kara heshiisyada, kan wax barashada, kan Handiga iwm.

## W

**Widerspruch** rafcaan; waa qoraalka lagaga hortago go´aamada ay laamaha dowladu samayso ee ku khuseeya.

**Wohngruppe** guriga kooxda dhalinta; waa magaca loo yaqaano goobaha ay hay´ada dhalintu dejiso koox dhalin ah oo ay ilaalinayaan shaqaale barbaariye-yaal ah.

## Z

**Zeugnis/se** shahaado; waa waraaqo muhiim ah, oo Iskuulka markaad dhamayso lagu siiyo. Waxaa lagu qori natiijadii aad ka heshay madooyinkii kala duwanaa eed baratay sida; luqada Jarmalka, xisaabta, Englishka iwm. Shahaadoyinkaaga waa inaad tusiso markaad Iskuulka badasho ama aad shaqo codsanayso.

Waxaa soo saaray
Dalada dhalinta waalid la´aan soo qaxday e.V
Paulsenstr. 55 - 56
12163 Berlin
Germany
Email: info@b-umf.de
Telephone : +49 (0)30 82 09 743 - 0
Fax: +49 (0)30 82 09 743 - 9

Dhalinta aan xuduuda lahayn
facebook: /jogspace
twitter: @jogspace
email: jog@jogspace.net
website: jogspace.net

**Design:** Kai Noah Schirmer & Ahmed Isam
November 2016

Sponsored by the
Silicon Valley Community Foundation and
supported through private donors

**Waxaa la shaqeeyay:** Iqbal Tariq, Wael Zardah, R. Mhandu, Aish, Alireza Hossein, Hava Morina, Gholam Rasool Hakimi, Nouhaila, Wisam, Soltan Akbari, Franzsika Schmidt, Mirjam Lewek, Janina Rost.

Waxaa mahad mudan Tobias Klaus and Ulrike Schwarz for editing.

Parts of the brochure are based on the first
welcome-brochure of the BumF

Somali-Übersetzung: Ahmed Abdullahi
Somali-Korrektur: Indho Abyan

Eberhard-Schultz-Stiftung
für soziale Menschenrechte und Partizipation

Gefördert vom:
Bundesministerium
für Familie, Senioren, Frauen
und Jugend

Deutsches
Rotes
Kreuz

www.kommgutan.info

Jugendliche ohne Grenzen

Bundesfachverband unbegleitete minderjährige Flüchtlinge

BumF